

WARBIXINTA WAXQABADKA GARSOORKA CIIDAMADA QALABKA SIDA

QORMADA SANADKA 2025



2026

2025

2024

TUSMO

1. LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY	2
2. KALMADDA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE CQS	3
3. DULMAR GUUD	4
4. SOOYAALKA GARSOORKA	5
i. Garsoorka ciidamada calabka sida	5
ii. Ujeeddada garsoor ciidan	6
iii. Shuruucda nidaamiya garsoorka ciidamada	7
iv. Xiriirka ka Dhexeeya Xeerka Nidaamiya Garsoorka & Xeerka Ciqaabta	9
v. Xafiisyada xeerilaalinta CQS	10
5. WAXQABADKA GARSOORKA CQS	11
i. Jaantustada gal dacwadeedyada & eedesanayaasha	13
ii. Toogashooyinka	24
iii. Tababarrada Garsoorka CQS	30
iv. Kormeerka xabsiyada iyo maxaabiista	38
v. Wacyigelinta iyo dhiirrigelinta ciidanka qalabka sida	41
vi. Nabadeynta deegaannada	52
vii. Nidaamka danabeysan ee maareynta xogta garsoorka CQS	54
6. QORSHAHA SANADKA XIGA EE 2026	55
7. CAQABADAHA	56
8. FURSADAHA	57
9. TALO SOO JEEDIN	58
10. GUNAANAD	60





LIISKA ERAYADA LA SOO GAABIYAY

- MCQS** – Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida
- JFS** – Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
- XCQS** – Xeer Ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka Sida
- CID** – Criminal Investigation Department
- NISA** – National Intelligence and Security Agency
- XDS** – Xoogga Dalka Soomaaliyeed
- SPF** – Somali Police Force
- CRIME SCENE** – Crime Scene Management Team
- DCT** – Digital Case Tracking
- FMS** – Federal Member States
- XLA** - Xeerka La-Dagaalanka Argagixisada
- XCCQS** - Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida
- XHCCQS** - Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida
- DIMS** - Database Information Management System
- CMS** - Case Management System



KALMADDA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE CQS



S/Guuto. Liiban Cali Yarow

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida

Aniga oo ku hadlaya magaca Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida, waxaa sharaf ii ah in aan soo bandhigo warbixintan ka tarjumeysa waxqabadka iyo horumarka la taaban karo ee Garsoorka Ciidamada intii lagu jiray sanadkii 2025. Sanadkan wuxuu ahaa mid ay jireen caqabado amni iyo kuwo bulsho oo culus, hase yeeshee garsoorku wuxuu muujiyay go'aan adag, adkeysii iyo mas'uuliyad sare oo ku wajahan ilaalinta sharciga, xaqiijinta caddaaladda iyo taageeridda amniga qaranka, isaga oo si dhow ula shaqeeyay hay'adaha amniga iyo bulshada.

Warbixintani waxay sidoo kale muujinaysaa guulo muhiim ah oo ay ka mid yihiin hirgelinta nidaamka dhijitaalka ah ee lagu maareeyo dacwadaha, tayeynta awoodda shaqaalaha, iyo xoojinta nabadeynta iyo wacyigelinta bulshada. Ugu dambayn, waxaan mahadcelin u jeedinayaa dhammaan garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha, saraakiisha iyo shaqaalaha Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida, iyo hay'adaha amniga ee naga garab istaagay gudashada waajibaadkan qaran. Waxaan rajeynayaa in warbixintani ay xoojin doonto kalsoonida iyo horumarka joogtada ah ee Garsoorka Ciidamada, si loo adkeeyo sharciga, qarannimada iyo nabadda waarta.



DULMAR GUUD

Warbixintan waxay si guud u iftiimaysaa doorka muhiimka ah ee Garsoorka iyo Xafiiska Xeer-Ilaalinta Ciidamada Qalabka Sida ay u guteen ilaalinta sharciga, sugidda amniga, iyo xasilinta bulshada sanadkaan. Waxay diiradda saaraysaa tallaabooyin wax-ku-ool ah oo degdeg ah oo laga qaaday falal amni-darro, colaado bulsho iyo dambiyada culus oo saameyn ku yeeshay noloshu shacabka iyo amniga qaranka, iyadoo la muujinayo sida garsoorku ugu hawlgalay waajibaadkiisa sharci ee ku saleysan caddaalad, hufnaan iyo isla-xisaabtan.

Warbixintu sidoo kale waxay ka tarjumaysaa dadaallada joogtada ah ee Garsoorka Ciidamada ee ku wajahan nabadeynta, wacyigelinta, iyo xoojinta wada-noolaanshaha bulshada, gaar ahaan deegaannadii ay ka dhaceen isku dhacyada hubeysan iyo colaadaha beeled. Booqashooyinka, dhiirrigelinta, wacyigelinta iyo nabadeynta goobaha dirirta bulsho ku dhax martay ayaa muujiyay in garsoorku uusan ku ekaan oo keliya qaadista dacwadaha, balse uu door firfircoon ka qaato ka hortagga khilaafaadka iyo soo celinta kalsoonida dadweynaha.

Intaa waxaa dheer, hordhacan wuxuu gogol-xaar u yahay falanqaynta horumarka hay'adeed ee Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida, gaar ahaan dhinacyada casriyeynta nidaamka maamul, hirgelinta hababka dhijitaalka ah, iyo tayeynta awoodda shaqaalaha. Guud ahaan, warbixintu waxay muujinaysaa in sanadkii 2025 uu ahaa xilli lagu tallaabsaday isbeddel la taaban karo, kaas oo dhidibbada u taagay aasaas adag oo lagu horumarinayo caddaaladda, amniga iyo xasiloonida qaranka sannadaha soo socda.

Sidoo kale, hordhacan wuxuu muujinayaa sida Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida uu ugu shaqeeyay duruufo amni oo adag, isla markaana uu uga jawaabay mas'uuliyad culus oo ka dhalatay kororka dambiyada iyo baahida sii kordheysa ee loo qabo caddaalad degdeg ah oo hufan. Isku-xirnaanta ka dhexeysa garsoorka, hay'adaha amniga, iyo bulshada ayaa noqotay tiir muhiim ah oo lagu xaqiijiyay in sharcigu noqdo mid ka sarreeya danaha gaarka ah, lana dhowro xuquuqda muwaadiniinta. Tani waxay muujinaysaa in Garsoorka Ciidamada uu yahay hay'ad istiraatiiji ah oo si buuxda uga go'an ilaalinta dowladnimada, sharciyadda iyo midnimada qaranka.



SOOYAALKA GARSOORKA CIIDAMADA QALABKA SIDA

i. Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida

Xeerarka Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida iyo Aasaaska Garsoorka Ciidamada

Xeerarka Garsoorka Ciidamada Qalabka waxay soo bilaabatay markii Soomaaliya ay qaadatay xorriyaddeeda. Xeer LR. 2, oo la soo saaray 31-kii Maajo 1964, ayaa nidaamiyey Garsoorka Ciidanka ka dib markii la aas-aasay Ciidanka Qalabka Sida.

Xeerkan wuxuu keenay qodoboo cusub oo muhiim u ah garsoorka Ciidanka, waxaana ka mid ah:

- Sharci-dajiyaha ayaa ka madax-bannaan hay'adaha garsoorka dalka, si Garsoorka Ciidanka uu u yeesho madax-bannaani gaar ah.
- Waxaa lagu bedelay qodobadii nidaamka Garsoorka rayidka ah ee dalka, iyada oo lagu qeexay in Garsoorka aysan ka mid noqon Maxkamadaha Gobollada iyo kuwa Racfaanka dalka, taasi oo ka dhigan in ay yeeshaan dhamaan ciidamada Qalabka Side Garsoor u gooni ah .
- Garsoorka Ciidamada waxa uu ikhtisaas gooni ah la yahay dhamaan ciidamada Qalabka sida, ciidan u ekaha, iyo ururada u abaabulan qaab ciidan

Si kastaba ha ahaatee, nidaamka Cadaaladda ciidamada wuxuu si cad u qeexayaa qaab-dhismeedka garsoorka ciidamada, iyadoo la dabaqayo xeerarka ciidanka ee kala duwan.

Waxaa ka mid ah:

- Xeerka Ciqaabta Ciidanka waqtiga Nabadda iyo Dagaalka (1963, Xeer LR.1, 24 December)
- Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada (Xeer LR.2, 31 Maajo 1964)

Xeerarkan waxay hubinayaan in Garsoorka Ciidamada ay si madaxbannaan u fuliyaan howlahooda garsoor, isla markaana ay waafaqsanyihiin xeerarka ciqaabta iyo hannaanka Ciidamada, iyadoo ilaalinaya sharciyadda iyo nidaamka Garsoorka Ciidanka.

Hannaanka Garsoorka Ciidamadu waa garsoor madax-bannaan, kana kooban Maxkamadaha iyo Xeer ilaalinta, wuxuuna ka garnaqaa dambiyo gaar ah si gooni ah u tilmaamay Sharuucaha dalka , si waafaqsan xeerarka iyo nidaamka Ciidamada.

Dhanka kale, hawl-wadeennada ka shaqeeya garsoorka Ciidamada waxa si guud loogu xilsaaray waajibaadka iyo xuquuqda ay leeyihiin sida kuwa kale ee Garsoorka iyo Xeer ilaalinta, iyadoo ay ku xiran tahay sida ay Shuruucda iyo Xeerarka u qeexayaan arrimaha garsoorka.



ii. Ujeeddada Garsoor u gaar ah C.Q.S

Ugu horrayntii, haddii shuruucda iyo xeerarka Dawladuhu ee nidaamiyay hannaanka garsoorka guud, ay xeerarkaas caddeynayaan jaadadka ama qaybaha Maxkamadaha, darajooyinkooda iyo Maxkamad kasta ikhtisaaskeeda, isla markaana ay isla shuruucdaasi tahay midda dejisa shuruucda laga rabo cidda qaabaneysa hawlaha garsoorka; haddii xaaladu ay sidaa tahay, ma jiro wax diidaya ama reebaya in isla shuruucdaasi ay abuuraan garsoor gooni ah oo ay hoos imanayaan xaalado iyo ikhtisaasyo cayiman, si waafaqsan xeer ugooni ah.

Dhanka kale, baddi Dawladaha caalamka waxay xeeriyeen ama diideyn in aan Ciidamada qalabka sida si guud la horgeynin garsoorka caadiga (shacabka) ah wixii la xiriira dembiyadooda ciidan ee ay galaan, taas beddelkeedana waxay abuureen garsoor ama golayaal u gaar ah ciidamada qalabka sida.

Hayeeshee, waxaa jira kala duwanaansho weyn oo u dhaxeeya shuruucda Dawladaha, marka la eego dembiyada hoos imanaya garsoorka Ciidamada. Qaar ka mid ah dowladaha waxay hoos geeyaan garsoorka Ciidamada dembiyada ciidan ee aan baraxa lahayn oo uu galo qof leh astaanta Ciidan, halka qof rayid ahna aanu marna hoos imaan karin xitaa haddii uu qayb ka yahay denbi ciidan. Sidoo kale, qofka Ciidanka ah haddii uu galo dembi caadi ah ma hoos-galo garsoorka Ciidamada. Dowlado kale ayaase qofka Ciidanka ah dembi kasta uu sameeyo hoos geeya garsoorka Ciidamada; dadka rayidka ahna, haddii ay qayb ka noqdaan denbi ciidan, iyaguna garsoorkaasi ayay hoos imanayaan.

Marka arrintan si qoto dheer loo baaro, waxaa lagu soo koobi karaa saddex sababood oo waaweyn oo keenay baahidaas, kuwaas oo kala ah:

1. In ay jiraan falal denbiyo ah oo marka laga eego dhinaca Ciidamada qalabka sida u baahan garsoor gooni ah, halka marka laga eego dhinaca bulshada rayidka ah aanay denbi ahaan u muuqan ama aanay suurtagal ahayn inay ka dhacaan. Tusaale ahaan, denbiyada Amar-diido ciidan, si xun ula dhaqmidida maxaabiista iyo dhaawacyada dagaalka, dayaca waajibaadka ciidan iyo waardiye, iyo dhammaan dambiyada la midka ah waxay ka mid yihiin falal culus oo lagu galo xeerka bahda iyo bulshada Ciidanka. Arrimahan waxay ka dhigayaan in kiisaskooda si gaar ah loo eego, ayna xalliyaan howl-wadeeno si khaas ah ugu tababaran xiriirka iyo xeer-hoosaadyada Ciidamada.
2. Hannaanka Ciidamada wuxuu ku dhisan yahay kala-danbayn, dicipline, hoggaansanaan, iyo ilaalinta jaranjarada talinta. Haddii midkood la jabiyo ama laga tallaabo, waxaa lagama maarmaan noqoneysa in si degdeg ah loo mariyo ciqaabta ku habboon, si ay ugu waano qaataan ciidamada kale oo aan nidaamka iyo tiirka jiritaankiisa loo wiiqin.



Isku darka qodobadan ayaa horseeday in la dhiso ama uu sii jiro garsoor u gooni ah Ciidamada Qalabka Sida, kaas oo ka jawaaba baahiyahooda gaarka ah isla markaana ilaaliya nidaamka iyo sum-cadda Ciidanka.

Waxaa kale oo Jiro ay Maxkamada La tacaamulaan Kooxaha Argagaxisa oo Lid Ku ah Awoodaha Qaranka Sida Daacish iyo Kooxda Alshabaab.

iii. Shuruucda Nidaamiya Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida (C.Q.S)

Xeerarkii lagu Aas-aasay Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida waxay soo baxeen intii u dhexeysay 24-kii December 1963 ilaa 31-kii March 1964. Si kastaba ha ahaatee, markii uu burburku ku dhacay nidaamkii dawladnimo, isla markaana dib u dhis lagu bilaabay hay'adihii dawladdu ku tiirsaneyd, waxaa si tartiib tartiib ah dib u billaabmay hawlgelinta guud ee hannaanka Garsoorka, oo uu qeyb ka ahaa Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida.

Dib u hawlgelintan waxay waafaqsan tahay qodobka 13-aad ee Dastuurka KMG ah, kaas oo qeex-aya in dhammaan shuruucdii hore u jiray ay sii ahaanayaan kuwo shaqeeya ilaa wax-ka-beddel lagu sameeyo ama laga baabi'yo.

Haddaba, shuruucda lagu dhisay Garsoorka Ciidamada waa saddex Sharci, kuwaas oo kala ah:

1. Sharci Lr. 2 – Soo baxay 31-kii Maajo 1964

Waxa uu quseeyaa Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida, wuxuuna ka kooban yahay 7 qodob.

Xeerkaan wuxuu qeexayaa:

- Qaab-dhismeedka Garsoorka Ciidamada, oo ay ka mid yihiin maxkamadaha, xeer-ilaalinta, iyo xarumaha maamulka cadaaladda ciidamada.
- Habka magacaabista howl-wadeennada garsoorka, darajooyinkooda, iyo muddada xil-heyntooda.
- Dhaarta shaqada, ceyrintooda, iyo awoodaha hay'adaha garsoorka Ciidamada.

2. Sharci Lr. 1 – Soo baxay 31-kii Maajo 1964

Sharci-gaan wuxuu khuseeyaa Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida, wuxuuna ka kooban yahay 70 qodob, oo loo kala qaybiyey:

- Qaybta Habka Ciqaabta waqtiga nabadda
- Qaybta Habka Ciqaabta waqtiga dagaalka

Xeerkan wuxuu nidaamiyaa dhammaan habraacyada ciqaabeed ee la xiriira fal-dembiyeedka ciidamada, iyada oo la kala saaray xaaladaha nabadeed iyo kuwa dagaal si loo hubiyo in nidaam ciqaabeed oo waafaqsan duruuf kasta loo helo.





3. Sharci Lr. 1 – Soo baxay 24-kii December 1963

Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida

Xeerkan wuxuu ka kooban yahay 414 qodob, wuxuuna u kala baxaa labo qeybood:

1. Ciqaabaha lagu dabaqo Xilliyada Nabadda
2. Ciqaabaha lagu dabaqo Xilliyada Dagaalka

Xeerka Ciqaabta Ciidamada wuxuu qeexayaa:

- Dadka hoos imanaya Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida
- Noocyada Ciqaabaha ciidamada ee asaasiga ah
- Ciqaabaha lifaaqa ah ee raaca kuwa asalka ah
- Waxyaabaha dambiga ku ah hannaanka iyo nidaamka Ciidamada
- Ciqaabaha ka dhalanaya haddii lagu xadgudbo nidaamka
- Waajibaadka ciidan iyo ciqaabta ka dhalanaysa haddii laga tago ama la dayaco

Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamadu wuxuu si cad u dhigayaa:

- o Hannaanka iyo wadiiqada baarista dambiyada Ciidanka
- o Habka oogista dacwadaha ciqaabta ah ee u gaarka ah Garsoorka Ciidamada
- o Sida loo socodsiiyo dacwadaha, laga bilaabo baaritaanka ilaa xukunka
- o Qaabka maxkamadeynta dadka gala dambiyada hoos yimaada Maxkamadaha Ciidamada
- o Habraacyada racfaanka iyo durista xukunada kasoo baxa Maxkamadaha Ciidamada
- o Sida ciqaabaha loo fulinayo marka xukun la gaaro

Haddii si kooban loo dhigo:

Xeerka Habka Ciqaabtu waa dariiqa iyo habraaca lagu dabaqo Xeerka Ciqaabta ciidamada. Waxay muujineysaa talaabo kasta oo sharci ah oo looga gudbo dambiga ilaa fulinta xukunka.



iv. Xiriirka ka Dhaxeeya Xeerarka Nidaamiya Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida iyo Xeerarka Ciqaabta Guud

Sida asalka ah, garsoorka caadiga ah (Maxkamadaha rayidka ah) waa hay'adda ka garnaqda dhammaan dacwadaha ka dhasha fal-dambiyeedyada, iyada oo raacaysa Xeerarka Ciqaabta Guud iyo xeerarka dhameystirka u ah. Maxkamadaha caadiga ah waxay leeyihiin ikhtisaaska guud ee ku saabsan dhammaan dambiyada, qofkasta oo gala dambiga, iyada oo aan loo eegin sifaha ama duruufaha gaarka ah ee dambiga. Hase yeeshee, Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida waa garsoor gaar ah. Maxkamadihiisu waxay leeyihiin ikhtisaas xaddidan, oo ku saabsan dambiyada cayiman iyo dad gaar ah. Ikhtisaaskan waxaa ka mid ah in la eego sifooyinka qofka dambiga galay, ceynta dambiga, iyo nooca dambiga. Sidaas darteed, Garsoorka Ciidamada waa mid kooban oo gaar ah, halka garsoorka caadiga ah uu yahay asal iyo mid guud. Haddii si camali ah loo eego, saddexda Xeer ee Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida waxay kala yihiin:

1. **Xeerka Nidaamka Garsoorka** wuxuu caddeeynayaa
 - i. Jaadadka maxkamadaha iyo heerarkooda
 - ii. Ikhtisaaska maxkamad kasta
 - iii. Xeer-ilaalinta iyo hawlaheeda
 - iv. Shuruudaha looga baahan yahay howl-wadeennada garsoorka
 - v. Arrimaha nidaaminta iyo maamulka garsoorka ee quseeya ciidamada
2. **Xeerka Habka Ciqaabta** Wuxuu qeexayaa hannaanka iyo wadiiqada baarista dambiyada ciidamada, habka oogista, socodsiinta dacwadaha ciqaabta ah, iyo qaabka fulinta ciqaabta.
3. **Xeerka Ciqaabta Ciidamada** Wuxuu caddeeynayaa:
 - i. Dadka hoos yimaada Garsoorka Ciidamada
 - ii. Noocyada ciqaabta asalka ah iyo ciqaabaha lifaaqa ah
 - iii. Waxyaabaha dambiga ku ah nidaamka ciidamada iyo ciqaabaha ka dhalanaya haddii lagu xad-gudbo
4. **Xeerka Ladagaalanka Argagaxisadda** Wuxuu caddeeyaa:
 - a. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa: "Sharciga La-dagaallanka Argagaxisada".
 - b. Ayada oo laga anbaqaadayo, waxyeellada iyo dhibaataada aadka u baaxadda weyn ee ka dhashay falalka ay argagaxisadu ku beegsatay diinta, dhiigga, hantida, xasilloonida, dawladnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed. Sidoo kalena, laga anbaqaadayo in hannaanka dawladnimada Soomaaliya ku salaysnaado sarreynta sharciga, ilaalinta xuquugda iyo xorriyaadka asaasiga ah; ayaa waxaa lama huraan nogday in la soo saaro sharci ujeeddadiisu tahay:
 1. La-dagaallanka, ka hortagga iyo ciribtirka hawlaha argagaxisanimada
 2. Xakamaynta fal-dembiyeedka ka dhasha argagaxisanimada; iyo
 3. In argagaxisada caddaaladda la horkeeno, si waafaqsan sharciga.



vii. Xafiisyada Xeer-Ilaalinta CQS

Xafiisyada Xeer-Ilaalinta Ciidamada Qalabka Sida (CQS) waxay xarunta dhexe ku leeyihiin Muqdisho, halka faracyo gobollada dalka oo ay ka hawlgalaan Saraakiil Xeer-ilaaliyaal ahi ay ka wadaan dacwad-oogista iyo ilaalinta sharciga. Xafiisku wuxuu baaraa oo maxkamadeeyaa dembiyada ay galaan ciidamada kala duwan ee Qaranka—Booliska, XDS, Asluubta, NISA—iyo ciidan u ekaanshaha sida jabhadaha, maleeshiyaadka iyo kiisaska argagixisada, iyagoo u maraya Qodobka laad ee Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida iyo Qodobka 35aad ee Xeerka La-dagaalanka Argagixisada.

Hawlaha rasmiga ah ee Xeer-ilaalinta waxaa qeexaya Qodobka 5aad ee XHCCQS. Xafiisku wuxuu ilaaliyaa ku dhaqanka xeerarka dalka (XCCQS), isagoo adeegsanaya awoodaha uu qaranku siiyay iyo hab-dhaqanka qaanuunka ciidamada ee lagu ansixiyay go'aanka Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Waaxyaha Shaqo ee Xeer-ilaalinta

- Qeybta La-dagaalanka Argagixisada
- Qeybta Kiisaska Ciidamada

Xafiisyada Kaabayaasha

- Maamulka
- Arkiifiyada iyo Diiwaanka Xogta
- Hagista
- Kormeerka
- Cabashada
- Tababarka
- Xiriirka & Iskaashiga Caalamiga ah

Qaab-dhismeedka Matalaadda Maxkamadaha

Waajibaadka Xafiiska waxaa qeexaya Qodobka 8aad ee XNGS (1962), Qodobka 12aad XHCS, iyo Qodobbada 71, 72, 110 iyo 163. Markuu Xafiisku matalayo dacwadaha ciqaabta



WAXQABADKA GARSOORKA CIIDAMADA

Warbixinta guud ee ka tarjumeysaa waxqabadka Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida (CQS) waxay muujineysaa koboc, firfircooni iyo adkeyn ku saabsan la-dagaallanka dambiyada iyo xaqiijinta cadaaladda ciidan. Sanadkii 2025 waxaa muuqda in koror weyn ku yimid tirada dacwadaha la furay, tirada eedeysanayaasha la horgeeyay maxkamadda, iyo sidoo kale tirada kiisaska lagu xukumay ciqaabta ugu adag. Tani waxay caddeyneysaa in garsoorku door muuqda ka qaadaneyo ilaalinta amniga, anshaxa iyo waajibaadka ciidanka, iyada oo adkaynaysa in ciidan kasta oo ku xad-gudba sharciga lala tiigsado caddaalad cad iyo isla xisaabtan.

Dacwadaha la xiriira eedeymaha argagaxisada ayaa ahaa kuwa ugu badan, gaar ahaan sanadkii 2025 oo ay gaareen in ka badan 1,470 gal dambi, taas oo ka tarjumeysa heerka khatarta amni ee ay dalka ku hayaan kooxaha nabad-diidka ah. Sidoo kale isla sanadkaasi waxaa si aad ah u kordhay dambiyada dilka, dhaawaca, dhaca, iyo lunsashada hanti ciidan. Tani waxay muujinaysaa culayska shaqo ee Maxkamadda Ciidamada u yaal iyo in hawlaha la xisaabtanka ciidamada iyo argagaxisada ay sare u kaceen. Tirada guud ee eedeysanayaasha la maxkamadeeyay 2025 waxay gaartay 6,036 eedeysane, taas oo laba jibbaar ka badan tiradii 2024 – caddeyn muujinaysa in hay'adaha baarista iyo garsoorku kordhiyeen dadaalkooda.

Xogtu waxay sidoo kale muujineysaa in Garsoorka ciidanka qalabka sida si gaar ah u dhowro xuquuqda carruurta la soo eedeeyo. Carruur badan oo loo haystay eedeymo kala duwan ayaa loo wareejiyay UNICEF iyo waalidkooda, halka qaar kalena loo gudbiyay xarumo dhaqan-celin. Xogta jaantusyada waxay tilmaamaysaa in eedeymaha la xiriira argagaxisada ay ugu badan yihiin 59%, halka dambiyada kale ee carruurta galaan ee askarimaroodiga ay yihiin 41%. Tani waxay muujinaysaa in carruur badan lagu qasbo ama lagu marin habaabiyo falalka argagaxisada, taas oo u baahan dadaal dheeri ah oo dhinaca ka hortagga ah.

Waxqabadka Garsoorka Ciidamada ee sannadka 2025 sidoo kale wuxuu muujinayaa kor u kac ballaaran oo ku saabsan tirada dacwadaha la baaray, la soo gudbiyey, iyo kuwa la xalliyey taasoo muujisay in NISA ay tahay hay'adda ugu badan ee soo gudbisa galalka baarista iyada oo soo gudbisay 1,460 gal, halka CID ay soo gudbisay 1,024 gal, XDS 851 gal, qaybta Guud ee Booliska Gobolka Banaadir 382 gal, halka Asluubtuna ay soo gudbisay 287 gal. Tani waxay muujinaysaa in hay'adaha amniga — gaar ahaan kuwa la dagaalanka argagaxisada — ay yihiin kuwa ugu badan ee soo gudbiya dacwadaha u baahan garnaqsi ciqaabeed.



Sanadka 2025 marka loo eego 2024, waxaa si weyn u kordhay tirada guud ee eedeysanayaasha. Tiradu waxay ka korortay 2,966 eedeysane sanadkii 2024 una gudubtay 6,036 eedeysane sanadkii 2025. Tani waxay ka dhigan tahay koror dhan 3,070 eedeysane, oo u dhiganta ku dhowaad 103.5%. Kororkan wuxuu muujinayaa in hawlaha amniga, baarista iyo dacwad-oogista ay si muuqata u bateen marka loo eego sanadkii hore. Sidoo kale, tirada guud ee galalka dacwadaha ayaa kordhay si la taaban karo. Galalka sanadkii 2024 oo ahaa 2,597 gal ayaa gaaray 4,004 gal sanadkii 2025, taas oo ah koror dhan 1,407 gal ama qiyaastii 54.2%. Arrintani waxay muujinaysaa ballaarinta shaqada garsoorka iyo kororka kiisaska la horgeeyay hay'adaha caddaaladda.

Marka la eego noocyada dambiyada, dhammaan qaybaha waaweyn waxay muujiyeen koror. Dambiyada argagixisada ayaa noqday kuwa ugu badan, iyadoo ka kordhay 359 kiis sanadkii 2024 una gudubay 1,470 kiis sanadkii 2025, taas oo u dhiganta koror ka badan 309%. Sidoo kale, lunsashada hantida ciidanka ayaa korortay 68.6%, halka dambiyada dilka ay gaareen 114% koror, dhaawacuna ku dhowaad 92%. Tani waxay muujinaysaa isbeddel culus oo ku yimid qaab-dhis-meedka dambiyada dalka.


Qaybinta eedeysanayaasha ee hay'adaha amniga sanadkii 2025 waxay muujinaysaa in Shabaab ay weli tahay kooxda ugu badan, iyadoo ka dhigan 45.4% dhammaan eedeysanayaasha. Waxaa ku xiga Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS) oo leh 29.6%, halka Macawisley, Booliska iyo NISA ay wadaagaan boqolley u dhexeeya 6% ilaa 7%. Hay'adaha kale sida Asluubta, Daraawiish, Daacish iyo D/Hoose waxay leeyihiin saamayn hoose marka loo eego tirada guud. Marka la eego afarta ciidan ee qalabka sida, XDS ayaa leh saamiga ugu weyn ee eedeysanayaasha, iyadoo qaadatay 67%. Booliska ayaa ku xiga 15%, NISA 14%, halka Asluubta ay qaadatay 4%. Tani waxay muujinaysaa doorka hoggaamineed ee XDS ee hawlgallada amniga.

Dhinaca juqraafiyeed, inta badan galalka dacwadaha waxay ka yimaadeen Gobolka Banaadir, kaas oo matalaya ku dhowaad 93.95% dhammaan dacwadaha dalka. Gobollada kale sida Galmudug, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle iyo Jubbaland waxay wadaagaan wax ka yar 6.1%, taasoo muujinaysa in culayska dacwadaha uu ku urursan yahay caasimadda.

Ugu dambeyn, marka la eego jinsiyadda eedeysanayaasha, inta badan waa muwaadiniin Soomaaliyeed oo gaaraya 99.90%. Eedeysanayaasha ka yimid dalalka kale sida Itoobiya, Yemen iyo Sudan waa tiro aad u yar, kana yar 0.2% wadarta guud. Tani waxay muujinaysaa in dambiyada la diiwaangeliyay ay inta badan ka dhex dhacaan bulshada gudaha dalka.




1. Jaantusyada Gal dacwadeedyada, Eedeysanayaasha, Dhibanayaasha, Hay'adaha Baarista soo gudbiya, Nuucyada Dembiyada, iyo Isbar bar dhigga 2024/2025.



Jaantuskan wuxuu muujinayaa isbar-bardhigga tirada galalka dacwadeed ee la furay 2024 / 2025:

- Galalka 2024: 2,597 gal
- Galalka 2025: 4,004 gal


Galalka 2025 la furay ayaa sare ukac sameeyay 54.2% in kabadan 2024 farqi ahaana noqon doona 1,407 gal



Jaantuskan wuxuu muujinayaa heerka guud ee dacwadaha sanadkii 2025 la maareeyay.

- **3364 Gal Dhamaaday (81%)** – Tiradan waxay muujineysaa in inta badan dacwadaha go'aano kasoo baxay, taasoo ka tarjumeysa in kiisaska loo maareeyay si dagdag ah
- **640 Gal Socda (19%)** – Kuwani waa kiisaska wali furan, kuwaasoo kujira habraaca dhammaystirka.






Eedeysanayaasha 2024 vs 2025

2024: 2,966 eedeysane


2025: 6,036 eedeysane

→ Waxaa muuqata in tirada eedeysanayaasha sanadkan laba jibaarantay, taas oo ka dhigan inay jirto kor ukac 103.5% farqi ahaana ay tahay 3,070 eedeysane



Jaantuskan “Jinsiyadda Eedeysanayaasha 2025” wuxuu muujinayaa in inta badan eedeysanayaasha sanadkan ay yihiin rag, kuwaas oo gaaraya **5,649 qof (94%)**, halka haweenku ay yihiin **387 qof (6%)**.






Jaantuska wareegga ahi wuxuu muujinayaa:

Da' weyn: 5,966 qof (98.84%).

Da' yar: 70 qof (1.16%).

Waxaa cad in inta badan eedeysanayaashu ay yihiin dad qaangaar ah.




Jaantuskan wuxuu muujinayaa tirada guud ee eedeysanayaasha sanadkan iyadoo loo kala saaray kooxaha ay ka tirsan yihiin. Kuwaasoo ka kooban (6036 eedeysane)

- Shabaab: **2,742** eedeysane (45.4%)
- Xoogga Dalka (X.D.S): **1,785** eedeysane (29.6%)
- Macawiisley: **404** eedeysane (6.69%)
- Booliska: **401** eedeysane (6.64%)
- NISA: **372** eedeysane (6.16%)
- Daraawiish: **126** eedeysane (2.09%)
- Asluubta: **121** eedeysane (2%)
- Askari Maroodi: **56** eedeysane (0.93%)
- D/Hoose: **17** eedeysane (0.28%)
- Daacish: **12** eedeysane (0.2%)




JAANTUSKA A5-ta Dembi ee ugu badan Cel celis ahaan



→ Dembiyada la xiriira argagixisada ayaa ahaa kuwa ugu badan ee garsoorka soo gaaray iyadoo kaalinta labaad ay kujirto lunsashada hanti ciidan.

JAANTUSKA Hay'addaha Baarista Soo Gudbisay




Jaantuskan wuxuu muujinayaa hay'adda ugu badan ee soo gudbisa kiisaska:

- **NISA: 1,460 (36%)** — Hay'adda ugu badan ee gal dacwadeed usoo gudbisa garsoorka CQS ayaa noqotay sanadkaan NISA taasoo muujineysa in ay badanaa maxkamadda CQS ay tahay hay'adda kaliya ay usoo gudbiyaan/keenaan eedeesanayasha.
- **CID: 1,024 (26%)** — In kastoo Boliiska qeybahiisa kala duwan ay la howl-galaan maxkamadaha kala duwan ee dalka
- **XDS: 851 (21%)**
- **Boliska Gobolka Banaadir: 382**
- **Asluubta: 287 (7.17%)** — Asluubta ayaa sanadkaan kor u kac sameysay sidii 2024 ay aheyd maadaama badankooda la geeyay furimaha.




JAANTUSKA DACWADAHA MAAMUL GOBOLEEDYADA



Gobolka Banaadir ayaa tirada ugu badan ee kiis laga diiwaan galiyay: 3,762 (94%) — Waxaana maamullada kale ka kala imaaday dacwado gaaraya KGS 65 kiis, Galmudug 122 kiis, Hirshabelle 33 kiis iyo jubbaland oo ay ka timid 22 kiis.

→ Tani waxay muujineysaa in gobolka banaadir uu noqday halka ugu badan ee ay dambiyada ka dhacaan guud ahaan dalka




Eedeysanayaasha ka tirsan 4 Ciidanka Qalabka Sida kuwaasoo gaaraya 2,679 eedeysane

- **XDS: 1,785 (67%)**
- **Boolis: 401 (15%)**
- **NISA: 372 (14%)**
- **Asluubta: 121 (4%)**

→ Ciidamada XDS waa kuwa ugu badan ee gal dacwadeedyadooda lagasoo gudbiyay sanadkaan.




EEDESANAYASHA AAN 4TA CIIDAN KA TIRSANEYN



Eedeysanayaasha aan ka tirsaneyn qeybaha kala duwan ee ciidamada Qalabka Sida.

- Macawiisley ayaa ugu badan: **404 (67%)** — Tani waxay muujinaysaa in kiisas badan ka yimaadeen goobaha ay ka howlgalaan macawiisleyda la safka ah Ciidanka Qalabka Sida.
- **Daraawiish (States): 126 (21%)** — Waxaa jira dacwado badan oo ka dhanka ah ciidamada maamul goboleedyada.
- **Askari Maroodi: 56 eedeysane (9%)**
- **dowladda Hoose: 17 eedeysane (3%)** ciidanka ilaalinta deegaanka xamar (Munishiibiyo) ayaa ah tirada ugu yar ee gal dacwadeedkooda soo gaaray garsoorka CQS




Eedeysanayaasha Argagixisada AL-Shabaab iyo Daacish

- Al-shabaab: **2,742 (99.56%)**
- Daacish: **12 (0.44%)**

→ Dhammaan kiisaska argagixisada sanadkaan waxaa u badnaa kooxda argagixiso Al-Shabaab.



GUUD AHAAN JINSIYADDA EEDESANAYAASHA




Jaantuskaan wuxuu muujinayaa tirada guud ee eedeysanayaasha iyadoo loo kala saaray jinsiyad:

- **6,030** waa eedeysanayaal Soomaali ah, kuwaas oo ah qaybta ugu badan.
- **4** waa muwaadiniin Itoobiya u dhashay.
- **1** eedeysane dalka Yemen u dhashay.
- **1** eedeysane dalka Sudan u dhashay.

Waxa muuqata in eedeysanayaasha **Soomaalida** ah kaliya ku koobneyn dambiyada oo ay jiraan eedeysanayaal ajaaniib ah.


TIRADA DHIBANAYAASHA RAG & DUMAR 2025



Tirada Dhibanayaasha dhibkooda la xaliyay iyo kuwa socda Rag & Dumar


- **Lab: 3,179 (75%)** Ragga ayaa ah kuwa ugu badan ee dhibanayaal ahaan loo diwan galiyay.
- **Dheddig: 1,051 (25%)** halka dumarka ay noqdeen 25% kamid ah dhibanayaasha xal loo helay.






Jaantuska Eedeysanayaasha Carruurta

- Carruurta **UNICEF** loo wareejiyay waxay gaareen **32** oo kala ah **18 wiil**, **14 gabar**
- Carruurta waalidkood loo wareejiyay: **29 wiil**
- Carruurta khatartooda sare lagu xukumay: **9 wiil** kaliya kuwaa oo ka tirsanaa argagixisada **Wiilasha** ayaa tirada ugu badan ka ah dhammaan qaybaha, halka **gabdhaha** kaliya lagu arkay carruurta UNICEF lagu wareejiyay.



- Carruurta lagu eedeeyay argagixiso iyo falal kale badankoodu waa wiilal waxayna gaareen **41** eedeysane (**59%**)
 - Askarimaroodi: **29** caruur ah (**41%**)
- Tani waa arrin muujineysa in carruur loo adeegsado falal militari ama argagixiso.







Jaantuskan wuxuu soo bandhigayaa tirada dadka xukunnada toogashada ah lagu fuliyay iyadoo loo kala saaray halka ay ka kala tirsanaayeen:

- Argagixiso: **16** xukunsanayaal waxana loo qisaasay **25** marxuum oo ay dileen
- Xoogga Dalka (X.D.S): **5** xukunsanayaal oo **4** marxuum ayaa loo qisaasay
- Daraawiish: **1** xukunsane waxana loo qisaasay **1** marxuum
- Booliska: **1** xukunsane kaasoo loo qisaasay **1** marxuum







Jaantusku wuxuu iftiiminayaa koror aad u weyn oo ku yimid dhammaan dembiyada la diiwaangeliyay sanadkii **2025** marka loo barbardhigo **2024**, iyadoo argagixisada ay korodhay ilaa **1,470** fal taas oo u dhiganta **309%**, dilalkuna ay gaareen **486 fal** oo ah **114%** koror marka loo eego **227-kiis** sanadkii hore. Sidoo kale, dhaawacyada ayaa sare u kacay **92%** (**153 → 294**), halka lunsashada hantida ciidanka ay gaartay **69%** koror (**452 → 762**). Dembiga Dhaca, oo sanadkii hore ahaa **214 kiis**, wuxuu sanadkan gaaray **548 kiis**, taas oo ah koror dhan **156%**, halka lunsashada hantida ciidan kor u kacday **69%**.

Guud ahaan, xogtu waxay muujinaysaa in heerka dembiyada la diiwaan galiyay sanadkaan **2025** uu si aad uga sarreeyo kii sanadkii hore.






Isbarbardhigga eedeysanayaasha **2024** iyo **2025** wuxuu muujinayaa isbeddello aad u kala duwan oo xooggan, iyadoo qaar ka mid ah cutubyada ay muujiyeen koror aad u sareeya halka kuwo kalena ay hoos u dheceen. Argagixisada ayaa kordhay **354%**, waxayna ka soo boodeen (**606 → 2,754**), halka Dowladda Hoose ay noqotay kooxda ugu kororka badan oo gaaray **440%**, iyadoo tiradu ka kacday 107 ilaa 578. Sidoo kale Asluubtu waxay kordhisay **50%**, halka NISA ay gaartay **33%** koror. Dhanka kale, hoos-u-dhac weyn ayaa ka muuqda Macawiisley (**-80%**), Daraawiish (**-86%**), iyo Askari Maroodi (**-49%**), halka Boolisku uu hoos u dhacay **11%**, X.D.S-na **13%**. Guud ahaan, sanadkii 2025 waxaa ka muuqda koror weyn oo ku yimid eedeysanayaasha la xiriiira argagixisada iyo dowladaha hoose, halka unugyo badan oo ciidan ay muujiyeen in kiisasoodu si muuqata u yaraadeen marka loo eego sanadkii ka horreeyay.



2. Toogashooyinka

Guud ahaan xogta la xiriirta fulinta xukunnada dilka (toogashada) ee ay Maxkamadaha darajada koowaad iyo Maxkamadda sare ee Ciidamada Qalabka Sida ka hirgeliyeen kiisaska dambiyada culus, gaar ahaan kuwa la xiriira argagaxisada iyo dilalka ula kac ah. Xukunnadan waxaa lagu fuliyay kaddib marka ay dhammaadaan dhammaan marxaladaha sharciga ah ee uu qabo nidaamka garsoorka dalka, iyadoo la hubiyay xaqa eedeysanaha ee difaac, racfaan iyo go'aan kama dambeys ah. Soo bandhigidda kala-horreynta taariikheed ee fulinta xukunnada dilka waxay muujineysaa joogtaynta iyo adkeynta hirgelinta go'aannada maxkamadeed, iyadoo si cad u iftiiminaysa doorka Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida ee ilaalinta amniga, kala dambeynta iyo caddaaladda. Qeybtani sidoo kale waxay ka tarjumeysaa sida sharciga diiniga iyo dastuurka loo dabaqay si isku mid ah, loona xaqiijiyay in dambiyada khatarta ku ah bulshada iyo qaranka lagu wajaho go'aan sharciyeed



Cabdi Xasan Rooble (Afeey) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada waxuuu Qawaa-riijta Uga qeyb qaatay Dhowr weerer oo kamid ah Gedo iyo shabeellada hoose kadib waxaa loo soo badalay Gobalka Banaadir oo ka mid Noqday Khawaarijta fulisa Dilalka Qorsheesan iyo qaraxyada Waxuu Dil ugeystay.



Dilal & Weeraro Argagixiso Cabdi Xasan Rooble (Afeey) ayaa ku lug lahaa weeraro argagixiso oo ka dhacay Gedo iyo Shabeellada Hoose. Markii uu Muqdisho yimid wuxuu ka mid noqday koox dilal

qorsheysan fuliya, isaga oo 20/02/2022 ku dilay Marxuum Cali Maxamed Xasan "Cali Gaab" oo ka tirsanaa Wasaaradda Gaadiidka.kuna dilay Degmada Wadajir Waaxda Xaawa Taako Oo laba Xabadood Uu Maxada Kaga dhuftay waxaa kiiskii Maxkamada U fariisatay 24/05/2022 Maxkamaddu waxay 22/06/2022 ku xukuntay dil toogasho waxana lagu fuliyay 07/08/2025

Ibraahim Cumar Shamcuun (Hubka) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka iyo in uu dil bareer ah ugeystay dil labo ganacsato oo kala ahaa 1. Qaasim Axmed Abuukar iyo Cismaan Cabdoow Cumar, wuxuuna dilka geystey xili Ramadaan, isaga oo dhabarka ka toogtay. Fadhiyo kala duwan ay maxkamada ka yeelatey galdacwadeedka eedeysanaha, Taariikhdu markey aheyd 26/04/2022 Maxkamadda Darajada Koowaad ayaa waxay ku xukuntay dil toogasho ah kadib caddeymo buuxa lagu helay. Maxkamada ayaa waxay ku fulisey qisaasta xukunka tariikhdu markey aheyd 07/08/2025



Qudaama Xamze Yuusuf Maxamed (Yaxye) Waxaa Lagu soo eedeyay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada Dilal Isdaba Joog ah Qudaama Xamze Yuusuf (Yaxye) ayaa lagu qabtay isagoo ku jiro fal dil oo ka dhacay degmada Kaaraan taas Shacabka Degmada Soo qabtayeen isla Taariikhda dilka uu geystay oo ah 19/10/2022, halkaas oo uu ku dilay Marxuum Shuukax Cadaawe Maxamed oo kamid ahaa Shacabka Degmada Kaaraan. Waxaa sidoo kale lagu helay dilka Ex X/le Cismaan Cabdi Macalin Yuusuf oo uu ku toogtay Yaaqshiid Xilli uu marxuumka salaada Ku soo tudaday masaajidka Alle Marxuumka Waxuu ahaa Dhaqtar Bartay Cillimiga Caafimaadka 17/03/2022 Sidoo kale Dhagradiisa Kuma Koobno waxuu Dil kugeystay Taariikhdu markey aheyd 8/12/2021 ka geestay Xaafada Suuqa Xoolaha Degmada Yaaqshiid Marxuum Cabaas Cali maxamuud oo katirsanaa Ciidanka Xooga dalka Soomaaliya Cabaas.Waxay Maxkamada Dil Toogasho Kuxuntay Diltoogasho Dil 17/01/2023 waxaana lagu fuliyay Taariikhdu markey aheyd 07/08/2025.



Kiiska: Buulle & Salaad Koofi –

Qarax loo adeegsaday Abaanduulihii Ururka 83aad Maxamed Xuseen Buulle iyo Aadan Isaaq Yarow “Salaad Koofi” ayaa loo adeegsaday qarax lagu dilay Abaanduule Ex Dhamme Ceydiid Maxamed Cali, kadib markii ay u adeegeen khawaarijta Dilkaas Oo ka dhacay Janaale 15/07/24 . Maxkamadda Darajada laad ayaa 18/08/2024 u fariisatay dhagaeyssiga islamaanltaas 18/08/2024 oo ah Taariikhda ku riday dil qisaas ah; xukunka waxaa la fuliyay 11/08/2025.



Kiisaska Baydhabo & Ceel Baraf – Dambiyada Ciidan & Aano Qabiil Maxkamadda CQS waxay Baydhabo ku fulisay dhowr xukun oo qisaas ah (23–24/10/2023) oo la xiriiray askar dilal u geystay shacab deegaanka ah. Sidoo kale Ceel Baraf, baaritaan lagu sameeyay dilka 5 askari oo ciidanka qaranka ahaa ayaa horseeday in la qabto maleeshiyaadkii falkaas geystay oo la horgeeyay caddaaladda.





Abuukar Axmed Maxamed oo looyaqaan (Anwar) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada waxuu dil bareer ah ugeystay Marxuum Cabdi Cabdulle Cismaan ayaa lagu qabtay isagoo dhaawac ah kadib markii uu Dilka uu geystay Taariikhdu markey aheyd 21/06/2022 Falkaas oo ka dhacay Degmada Dayniile gaar ahaan agagaarka Aarkada Waxaana Galdacdaeedkiisa Loo fariistay Taariikhdu markey aheyd 19/07/2022, iyadoo Maxkamadda Darajada Koowaad ay Xukun dil Toogasho Ku xukuntay taariikhdu markey aheyd 23/07/2022 waxaana dilka toogashada lagu fuliyay 14/08/2025

Xasan Cali Xuseen (Garaad) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada, Dilal Qorshaysan Xasan Cali Xuseen (Garaad) ayaa ka tirsan shabakad abaabulan tan iyo 2020, kuwaas oo ka howlgalayay magaalada Muqdisho. Waxaa lagu helay inuu dilay Marxuum Ex D/le Cabdi Raxmaan Cabduqaadir Cabdi, falkaas oo ka dhacay wadada Fagax-Hotel Guuleed. Ee degmada yaaqshiid Dilkaas oo geystay 18/06/2022 Dacwad baaris kadib, Maxkamadda ayaa 17/12/2022 fadhiga ku riday xukun dil toogasho ah. Dhageysiga 19/07/2022 waxaana Lagu Fuliyay 14/08/2025



Xamsa Jeylaani Cabdullaahi (Abtiga) ayaa lagu soo eedeyay in uu kamid ahaa Kooxda argagaxidada iyo in uu Qarax Miino ugu dhajiyay gaariga Taliyihii NISA ee Buufow Bacaad, Marxuum Xasan Cusmaan Cali (Xasan Biyatooni). Qaraxaas oo ka dhacay degmada marka Taariikhdu markey aheyd 10/06/2023. Waxaa dacwadiisa loo fariistay Taariikhdu Markey ahaeyd 29/08/2023 waxaana maxkamada darajada Koowaad heshay xukun Dil toogasho ah taariikhdu markey aheyd 13/09/2023 . Waxaana Qasaata Xukunka Dilka ah lagu Fuliyay 14/08/2025 oo ah Qasaastii Taliyihii NISA ee Buufow Bacaad, Marxuum Xasan Cusmaan Cali (Xasan Biyatooni)



Saleebaan Xuseen Nuur (Siyaaf) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada. Eedeysanaha wuxuu dil bareer ah u geystey Marx.Ex Dable Saleebaan Maxamed Ibraahim, eedeysnaha oo ku howlgalayay magacyo badan ayaa 27/03/2025 ilinka hore ee gurigiisa ku dilay Ex Dable Saleebaan Maxamed Ibraahim, isaga oo dhaawac culus gaarsiiyay qof kale. Taariikhdu markey aheyd 17/05/2025 ayaa maxkamada Darajada 1-aad ku xukuntey dil toogasho. Ugu dambeyn Maxkamada 20/08/2025 ku fulisey xukun dil qisaas ah.



Kiiska: Anas C/qaadir Cali Maxamuud (Salmaan) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada, wuxuuna katirsanaa Shabakaddii Mudug Anas iyo Aadan waxay ahaayeen madax & xubno ka tirsan shabakad dilal, qaraxyo iyo beegsiga culimada iyo nabadoonada ka fulin jirtay Gaalkacyo iyo Mudug. Anas oo dilay Cilmi Cali Guuleed oo katirsanaa hayada Socdaalka iyo jinsiyada ayuu kulay Masjid uu ka soo baxay Masjidka Maxamedun Rasuulu laah kuna yaalo Gaalgalyo Qeybta Putland 16/07/2022 sidookale 11/03/2023 waxauu dilay Nabadoon Cabdi Aadan siyaad (Cabdi Dheere) oo siwaan garanayay Gaalgacyo oo uu dilay xilli maqrib uu salaada Kasoobaxay Masaajidka Ramadaan. Maxkamada ayaa waxay ku fulisey xukunkii dilka tariikhdu markey aheyd 25/08/2025.



C/qaadir Abuukar Axmed (Nasrudiin iyo saabir) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada. Eedeysanaha wuxuu Dil u geystey Ex Dable Maxamed Aadan Isaaq, dilkaas oo 03/07/2023 Degmada Garasbaaleey Nabadoon Salaad Cali Aadan Wiid uu Dilay 08/08/2023 kadib uu C/qaadir oo uu 11/08/2023 oo uu dilay ganacsade Isaaq Aadan cali maalin Jimca ah uu dilay Degmada Hodan Kadib Markii uu damcay in uu baxsado lagu soo qabtay isagoo dhaawac ah iyo Isaaq Aadan

Cali. Maxkamadda 24/03/2024 waxayna Maxkamadda 20/08/2025 ku fulisey xukun dil qisaas ah.



Aadan Mursal Maxamed Iidoow oo Khawaajijta ku biiray Sanadka 2022. Eedeysanaha Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada. Wuxuu dil u geystey nabadoon Maxamed Jaamac Caga Biyood, Waxay dileen Nabadoon Cabdi Dheere, Cilmi Cali Guuleed iyo dhaawacyo badan geysteen. 15/10/2022 uu masjidka Ramadaan. Taariikhdu markey aheyd 20/03/2023 ufariisatay garmaqalka galdacwadeedka. Maxkamadda Darajada laad waxay 22/05/2023 Racfaan 30/05/2023 Xukunka Maxkamada Sare 23/09/2023 ku xukuntay dil toogasho ah. Waxaana lagu fuliyay 25/08/2025.



Ibraahim Aadan Nuur (Muudeey) Waxaa Lagu soo eedayay in uu katirsanaa ururka argagaxisada Qeybta dilalka gaadmada Dilka Marxuumad Khadiijo Siyaad Maxamed Ibraahim Aadan Nuur (Muudeey) ayaa lagu helay inuu si naxariis-darro ah u dilay Marxuumad Khadiijo Siyaad Maxamed oo kamid aheyd Shaqaalaha nadaafada Degmada Hodan , kadib markii saga Dhigay Qof oon la haraadsan kadib ayay Marxuumada ugu dirtay Biyaha gabar ay dhashay markii uu ogaaday in Gabadha Gudaha Guriga Gashay uu dilay Marxuumada sidaas ayaa ciidan ka ag dhawaa Lagu soo Qabtay Goobtaas falkaas oo ka dhacay degmada Hodan Gaar ahaan Waaxda kacaan taariikhdu markey aheyd waxayna Maxkamadda Ciidamada Darajada laad ufariisatay taariikhdu markey ahaeyd 09/05/2024 kadib dhaeysiga waxay maxkamada Xukun dil toogasho ah soo Saartay Taariikhdu markeyd aheyd 18/05/2024 iisagoo dilka toogashada Lagu fuliyay Taariikhdu markeyd aheyd 01/09/2025.

Cabdiraxmaan Maxamed C/laahi (Maaxi/ Yoonis) Waxuu Al shabaab Kaga Biiray Jilib. Waxaa lagu soo eedeeyey dilka nabadoon Cabdi xasan Maxudiin iyo Khadar Cadow Jimcaane waxaana Goobtaas ku dhaawacmay C/laahi Maxamed Falkaas oo ka dhacay Degmada dayniile taariikhdu markey aheyd 04/04/2024 waxaana Kiiskiisa loo fariistay 02/10/2024 waxay Maxkamada ku Xukuntey Dil. Taariikhdu markey aheyd 13/10/2024 Waxaana dilka Qisaasta lagu fuliyay Taariikhdu markeyd aheyd 01/09/2025.



EX.D/le X 11014 Bashiir Macalin Maxamuud 48 jir Waxaa lagu soo eedeeyey in uu dil bareer ah u geystey Ex.Dale X 22817 C/raxmaan Mataan Maxamed Keer oo katirsanaa ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed marxuumka ayaa horey dil uga soo geystey Ex.D/le X C/naasir Nuur Ibraahim oo qaraabo ahaayeen gacan ku dhiiglaha ayaa durbadiiba dilka geystey qaab aarsi ahna u dilay marxuum C/raxmaan mataan maxamed keer Waxayna Maxkamadda ciidamada qalabka sida u fiirsatay taariikdu markii ay ahayd 29/11/2025 kadib dhegeysiga Waxay Maxkamadda Xukun Dil toogasha ah Soo saartay Taariikhdu markey ahayd 21/11/2025 isagoo dil toogashada lagu fuliyey.



EX.D/le dar C/samad Xasan Madnuur 20 jir Waxaa lagu soo eedeeyey in uu dil ah u geystey Ex Marxuum C/wahaab C/raxmaan Yuusuf oo Gaari caasi ah saarnaa kuna sii socda magaalada muqdisho wuxuu ahaa musaafir Gacan Ku dhiiglaha ayaa muran dhexmaray daraawalka gaariga isagoo weydiiyey 2\$ lacag ah markuu yiri mahaayo lacag ee Iga hor leexo maadaama goobta ay joogaan kontorool ahayn una yimid kaliya in uu dhac geysto waxaana wehlinaayey xukunsane D/le dar Salaad Ibraahim Xuseen dood kadib wuxuu ku dhufatay xabado ak47 ah waxaana ku dhintay Ex Marxuum C/wahaab C/raxmaan Yuusuf waxaana ku dhaawacmay dhibanad sahiro qaasim maxamed Waxayna Maxkamadda ciidamada qalabka sida u fiirsatay taariikdu markii ay ahayd 29/11/2025 kadib dhegeysiga Waxay Maxkamadda Xukun Dil toogasha ah Soo saartay Taariikhdu markey ahayd 2/09/2025 isagoo dil toogashada lagu fuliyey



3. Tababarrada Garsoorka CQS

Tababar gaar ah ayaa loo qabtay leyli-saraakiil dhawaan dibadda tababar boliis uga soo noqday, si ay u wadaagaan aqoontii iyo khibraddii ay soo barten. Tababarkuna wuxuu diiradda saaray habka oogista dacwadaha, iyo sharciyada qaanuun ee dalka uyaalla iyadoo lagu xoojiyay awoodda baarayaasha ka howlgala Hoggaanka Baarista Dembiyada ee CID. tababarkaasoo lagu qabtay Kuli-yadda Tababarka Boliiska ee Gen. Kaahiye Taariikhda markii ay ahayd 10 August 2025



Gabdhaha ka tirsan ciidanka boliiska soomaaliyeed ayaa loo tababaary in ay baaraan faldambiyeeydayada lagu eedeeyo Dumarka si xiliga Baarista ay u helaan Haween dhigooda ah una helaan Caddaalad iyo Baaris Ku saabsan Sida loo baaro Tacaddiyada loo geysto Carruurta iyo Haweenka ayaa lagu qabtay Kuli-yadda tababarka boliiska Gen kaahiye Taariikhda marka ay ku beegneed 12 August 2025





Tababar ayaa loo qabtay saraakiil ka tirsan Qeybta Baarista Dembiyada (CID), kaas oo diiradda saaray marinka cadaaladda iyo habraacyada oogista dacwadaha, si loo xoojiyo isku xirka baarista iyo xeer ilaalinta.

Goobta: Hogaanka Baarista Dambiyada CID

Taariikh: 19 August 2025



Xafiiska Xeer Ilaalinta Ciidamada Qalabka Sida ayaa wacyigelin iyo kormeer ku sameeyay xarun tababar oo ay ku jireen iidank ka tirsan Boliiska Soomaaliyeed gaar ahan Ciidamada Daraawiishta . Tababarku wuxuu diiradda saaray shuruucda iyo xirfadaha uu Boliisku ku shaqeeyo, gaar ahaan ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta, ka shaqeynta baraha kontaroolada iyo sugidda sharciga iyo kala dambeynta.

Taariikh: 14 September 2025



Xafiiska Xeerilaalinta ayaa ka qeyb qaatay tababar loo sameeyay saraakiil dalacday, kaas oo ku saabsanaa shuruucda, nidaamka maamulka iyo hababka baarista. Tababarkan wuxuu qeyb ka ahaa isbeddel ballaaran oo Akadeemiyadda Boliiska laga hirgeliyay, kaas oo ballaariyay habka waxbarista ciidanka kana gudbay tababarka ku kooban gaardiskasarrrra. Saraakiisha dalacday ayaa tababar-ran dan ka dhigtay bilow rasmi ah oo kor loogu qaadayo aqoontooda, lana hirgelinayo isbeddel ku yimaada hab-dhaqanka iyo fahamka shaqo ee Ciidanka Boliiska. Taariikh: 20 September 2025



Garsoorka Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ayaa ka qeyb qaatay tababar ay bixisay hay'adda FRC, kaas oo ku saabsanaa Dambiyada Maaliyadeed (Financial Crime Investigation). Tababarku wuxuu socday muddo saddex maalmood ah, iyadoo lagu xoojiyay aqoonta la xiriirta la-dagaallanka dambiyada dhaqaalaha.

Taariikh: 25-27 October 2025





Taariikh: 27 Agoosto 2025

Goobta: (Goobta tababarka Gor Gor – haddii loo baahdo waa lagu dari karaa)

Xeer-ilaaliye Bashiir Cabdi Macalin ayaa wacyigelin iyo tababar shaqo ugu tegay cutubyo ka tirsan Komandoska Gor Gor ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS), iyadoo tababarkan uu ka dhacay 27 Agoosto 2025. Ujeeddada tababarkan waxay ahayd kor u qaadista fahamka sharciga, anshaxa ciidan iyo waajibaadka qaran ee saaran ciidamada gaarka ah ee howlgallada amniga iyo difaaca dalka ku jira.

Intii uu socday tababarka, Xeer-ilaaliyaha ayaa faahfaahin ka bixiyay xeerarka hagaya hawlgallada ciidan, mas'uuliyadda sharciga ee askariga, iyo muhiimadda ay leedahay ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta, gaar ahaan marka ay ciidamada ku howlan yihiin howlgallo amni. Waxaa sidoo kale diiradda la saaray ku-dhaqanka hab-dhaqanka wanaagsan, dhowrista shuruucda dalka, iyo ka fogaanshaha fal kasta oo dhaawici kara sumcadda Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, tababarku wuxuu noqday fursad lagu xoojiyay wacyiga sharciga iyo xiriirka ka dhexeeya Xafiiska Xeer-ilaalinta Ciidamada Qalabka Sida iyo Komandoska Gor Gor. Xeer-ilaaliye Bashiir Cabdi Macalin ayaa ku dhiirrigeliyay ciidamada inay sii laban-laabaan dadaallada difaaca qaranka, iyadoo ku shaqeynaya hufnaan, anshax iyo ixtiraamka sharciga, si loo xaqiijiyo amniga, midnimada iyo danaha guud ee dalka.





Goobta: Xerada Maslax, Degmada Heliwaa – Muqdisho

Saraakiil ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida ayaa kormeer iyo wacyigelin shaqo ugu tagay Ururka 231aad ee Guutada 23aad (MP) ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS), kuwaas oo ku sugan Xerada Maslax ee Degmada Heliwaa, Magaalada Muqdisho. Kormeerkan ayaa qeyb ka ahaa dadaallada lagu xoojinayo anshaxa ciidan, ku-dhaqanka sharciga iyo hufnaanta howlaha amni ee ay fuliyaan ciidamada.

Intii uu socday kormeerka, saraakiisha ayaa ciidamada ka wacyigeliyay hab-dhaqanka laga rabo askariga Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa u xilsaaran sugidda amniga, ilaalinta xarumaha dowladda iyo fulinta waajibaadka qaran. Waxaa si gaar ah loo adkeeyay muhiimadda ay leedahay dhowrista xuquuqda shacabka, ilaalinta hantida Qaranka, iyo in howl kasta lagu fuliyo si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada dalka.

Ugu dambeyn, saraakiisha ayaa ku dhiirrigeliyay Ururka 231aad ee Guutada 23aad (MP) in ay sii xoojiyaan feejignaanta, anshaxa iyo masuuliyadda ka saaran amniga caasimadda. Kormeerkan iyo wacyigelinta la bixiyay ayaa lagu tilmaamay kuwo kor u qaadaya kalsoonida u dhaxeysa Ciidamada Qalabka Sida iyo bulshada, isla markaana xoojinaya doorka ciidanku ku leeyihiin sugidda nabadgelyada iyo kala dambeynta guud.



Tababar Baarista Dambiyada Casriga ah (Technology-based Crimes)

Waxaa la qabtay tababar ku saabsan baarista dambiyada casriga ah ee loo adeegsado tiknoolajiyadda, kaas oo ay ka faa'iideysteen saraakiil ka tirsan Xafiiska Xeer Ilaalinta CQS. Tababarku wuxuu xoojiyay xirfadaha la xiriira dambiyada dhijitaalka ah iyo adeegsiga qalabka casriga ah ee baarista.

Goobta: Kuliyadda Tababarka Boliiska Gen. Kaahiye

Taariikh: 07 December 2025



Tababarrada la qabtay sanadkii 2025 waxay si muuqata uga tarjumayaan dadaalka joogtada ah ee Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida iyo hay'adaha la shaqeeya lagu xoojinaayo aqoontooda, xirfadaha iyo hufnaanta saraakiisha ku howlan garsoorka, xeer ilaalinta iyo baarista dambiyada. Tababaradu waxay taabteen dhinacyo muhiim ah sida ilaalinta xuquuqda haweenka iyo carruurta, marin-ka cadaaladda, oogista dacwadaha, iyo la-dagaallanka dambiyada casriga ah iyo kuwa maaliyadeed, taas oo sare u qaadday tayada shaqo ee hay'adaha garsoorka.

Guud ahaan, waxqabadkan tababarrada ah wuxuu horseeday horumar la taaban karo oo ku yimid fahamka sharci, hab-dhaqanka xirfadeed iyo wada shaqeynta hay'adaha amniga iyo garsoorka. Tani waxay gacan ka geysaneysaa xaqiijinta cadaalad waarta, adkeynta sharciga iyo kor u qaadista kalsoonida bulshada ee nidaamka garsoorka Ciidamada Qalabka Sida.



Qalin-jabinta Dufcada Lixaad ee Sanadka 2025

Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida ayaa hirgeliyay barnaamij tababar oo lagu xoojinayo aqoonta iyo xirfadaha ardayda baratay sharciga ee kasoo qalin-jabiyay jaamacadaha dalka kuwaasoo ku qaatay tababarrada aqoonta iyo barashada dacwad oogista qaab ficil ahaan waxayna qaadaneen muddo gaaraysa lix bilood.

Dufcaddii Lixaad ayaa dhammeysay sanadkaan 2025.



Qalin-jabinta Dufcada Toddobaad ee 2025

Dufcaddii Todobaad ayaa iyaduna dhammeystirtay tababarkii loo asteeyay, iyadoo si qoto dheer diiradda loo saaray marinka cadaaladda, baarista hufan iyo adeegsiga hababka casriga ah ee la dagaallanka dambiyada waxayna si guud u dhammeeyeen 2025, dufcaddan labaad ayaa si rasmi ah u aflaxday una qalin-jabisay, taas oo caddeyneysa joogteynta iyo miro-dhalnimada tababarrada Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida, inkastoo ay dufcaduhu ku kala duwanaayeen waqtiyada ay tababarka dhammaysteen.





Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida waxaa sanadkan Soomaaliya uga qeyb galay Madasha 9aad ee Isla-Xisaabtanka Afrika oo ka dhacday Cotonou, Benin, waxaana matalayay G/Sare Axmed Khalif Jinow, isaga oo kamid ahaa 85 sarkaal oo ka kala socday 24 dal ee Afrikaan ah iyo Maraykanka. Madashu waxay diiradda saartay mas'uuliyadda sharciga ah ee taliyeyaasha, xiriirka taliyeyaasha iyo la-taliyeyaasha sharci, iyo habraacyada sharci ee howlgallada ciidan, iyadoo sidoo kale lagu qabtay casharro iyo bandhigyo (presentations) caalami ah.



Waxa kaloo Gud. G/Sare Xasan Cali Nur Shuute iyo Kuxigeenka Xeerilaaliyaha Guud ee CQS Maxamed Khaliif ay Tababar ka dhacay dalka dibaddiisa uga qeyb galeen xoojinta aqoonta Garsoorka CQS, waxaana lagu bartay maareynta goobaha qaraxyada, baarista cryptocurrency-ga, hababka casriga ah ee wareysiyada eedeysanayaasha (interrogation techniques), iyo sida xogaha sirdoonka loogu beddelo caddeymo sharci ah, taasoo kor u qaadday xirfadaha iyo fahamka sharci ee hawlgallada gudaha iyo kuwa caalamiga ah.



Saraakiil ka socday Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida ayaa ka qeyb galay tababar heer caalami ah oo lagu qabtay Jamhuuriyadda Turkiga, kaas oo diiradda lagu saaray ka hortagga maalgelinta argagixisada iyo la-dagaallanka falalka argagixiso.

Tababarkan ayaa waxaa ka soo qeyb galay masuuliyiin iyo khubaro ka kala socday hay'adaha amniga, garsoorka iyo laamaha maaliyadda dalal kala duwan, waxaana si gaar ah loogu falanqeyyay hababka casriga ah ee lagu ogaado, lagu xakameeyo laguna joojin karo ilaha dhaqaale ee ay adeegsadaan kooxaha argagixisada.

Intii uu socday tababarka, ka-qeybgalayaasha ayaa si qoto dheer u bartay:

- Aqoonsiga shabakadaha maalgelinta argagixisada
- La-socodka dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee sharci-darrada ah
- Xoojinta iskaashiga u dhexeeya hay'adaha amniga, garsoorka iyo bangiyada
- Adeegsiga sharciyada caalamiga ah iyo heshiisyada lagu la-dagaallamo argagixisada

Sidoo kale, tababarka ayaa lagu bixiyay casharro la xiriira xoojinta awoodda hay'adaha dowliga ah, kor u qaadista hufnaanta baarista dambiyada la xiriira maalgelinta argagixisada, iyo hababka wadaagga xogta amni ee muhiimka ah. Mas'uuliyiinta ka qeyb galay tababarka ayaa sheegay in aqoonta iyo waayo-aragnimada ay heleen ay door muhiim ah ka qaadan doonto xoojinta amniga, sugidda sharciga iyo la-dagaallanka khataraha argagixiso ee ka jira gobolka iyo guud ahaan caalamka.

Ugu dambeyn, tababarkan lagu qabtay dalka Turkiga wuxuu muujinayaa muhiimadda iskaashiga caalamiga ah ee lagu wajahayo argagixisada, gaar ahaan joojinta ilaha dhaqaale ee ay ku tiirsan yihiin kooxaha argagixisada.





4. Kormeerka Xabsiyada iyo Maxaabiista

Sannadka 2025, Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida (CQS) wuxuu mudnaan gaar ah siiyay korjoogteynta xabsiyada iyo hubinta xaaladaha maxaabiista, iyadoo laga duulayo waajibaadka dastuuriga ah iyo xeerarka gaarka ah ee nidaamka garsoorka ciidamada. Kormeerkan wuxuu qeyb ka ahaa dadaallada lagu xoojinayo ilaalinta xuquuqda aadanaha, sare u qaadidda isla-xisaabtanka hay'adaha xabsiyada, iyo hubinta in maxaabiista loo hayo si waafaqsan sharciga dalka iyo habraacyada ciidamada.

Safarro shaqo oo qorsheysan ayaa lagu tagay Xabsiga Dhexe ee Xamar, Xabsiga KM7, saldhigyada degmooyinka Gobolka Banaadir, iyo xarumaha baarista dambiyada ee CID, halkaas oo guddiyo ka socda Garsoorka CQS ay si qoto dheer u qiimeeyeen xaaladda guud ee xabsiyada. Kormeerku wuxuu diiradda saaray hab-raacyada maamulka xabsiyada, nidaamka diiwaangelinta maxaabiista, heerka adeegyada caafimaad iyo nadaafadda, xaaladda quudinta iyo helitaanka biyo nadiif ah, iyo sidoo kale amniga gudaha iyo habka ilaalinta maxaabiista.



Inkastoo ay jiraan horumarro laga sameeyay dhinacyada maamulka iyo tirakoobka maxaabiista, haddana ay weli jiraan caqabado u baahan wax-ka-qabasho degdeg ah. Caqabadahaas waxaa ka mid ahaa ciriiriga ka dhashay tirada maxaabiista oo mararka qaar ka badan awoodda xabsiyada, baahiyo la xiriira nadaafadda, iyo yaraanta qalabka caafimaadka iyo agabka aasaasiga ah ee lagu bixiyo adeegyada bulshada ee gudaha xabsiyada.

Ujeeddada kormeeradan ayaa ahayd in la xaqiijiyo in maxaabiista loo hayo si waafaqsan xeerarka dalka iyo shuruucda ciidamada, in la ilaaliyo xuquuqdooda aas-aasiga ah, iyo in xarumaha xabsiyada ay u hoggaansamaan nidaamka iyo anshaxa ciidamada. Sidoo kale, kormeerku wuxuu gacan ka geystay in si cad loo aqoonsado caqabadaha jira, loona diyaariyo xog rasmi ah oo saldhig u noqota qorsheyaal horumarineed oo waqti dhow iyo mid fog ah.

Intii lagu guda jiray kormeerka, Garsoorka CQS wuxuu diiwaangeliyay dhowr qodob oo muhiim ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin: in meelo badan laga dareemay horumar dhanka maamulka iyo diiwaangelinta maxaabiista, in baahiyaha caafimaad ay weli u baahan yihiin xoojin iyo maalgelin joogto ah, in shaqaalaha xabsiyada qaarkood ay u baahan yihiin tababar dheeri ah oo la xiriira maaraynta maxaabiista iyo xuquuqda aadanaha, iyo in ay jiraan arrimo dayactir iyo dib-u-habeyn u baahan in lagu sameeyo dhismayaasha xabsiyada iyo sahayda adeegyadooda.

Iyadoo laga duulayo natiiyooyinkaas, Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida wuxuu soo saaray talooyin iyo go'aanno wax-ku-ool ah oo lagu horumarinayo maamulka xabsiyada. Talooyinkaasi waxay isugu jireen kordhinta tababarada shaqaalaha xabsiyada, hirgelinta nidaam diiwaangelin casri ah oo hufan oo lagu kaydiyo xogta maxaabiista, hagaajinta adeegyada caafimaad iyo nadaafadda, iyo dardargelinta dayactirka dhismayaasha xabsiyada iyo goobaha adeegyada la xiriira.

Guud ahaan, talooyinkan iyo go'aannadan waxay ka mid noqonayaan tiirarka muhiimka ah ee qorshaha horumarinta Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida ee sanadka 2026, iyadoo ujeedkoodu yahay in la helo xarumo xabsiyeed oo u hoggaansan sharciga, dhowra kara xuquuqda maxaabiista, isla markaana la jaanqaada nidaamka ciidamada iyo heerarka caddaaladeed ee qaranka.





5. Wacyigelinta Ciidanka Qalabka Sida

Xafiiska Xeerilaaliyaha Ciidamada Qalabka Sida ayaa kulan shaqo ku qabtay furimaha hore ee difaaca Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS), gaar ahaan Ururka 291aad ee Guutada 29aad “Daljir”, kuwaas oo ku jira howlgallo lagu ciribtirayo fadhiisimaha iyo goobaha ay ku dhuumaa-leysanayaan kooxaha cadawga ah. Kulankan ayaa qeyb ka ahaa dadaallada lagu xoojinayo isku-xirka howlgalada amni iyo ku-dhaqanka nidaamka sharciga inta lagu jiro hawlgallada difaaca qaranka.

Kulanka intii uu socday, Xeerilaaliyaha Ciidamada Qalabka Sida ayaa ka hadlay muhiimadda ay leedahay in ciidamada howlgallada ku jira ay si buuxda ugu hoggaansamaan anshaxa ciidan, shuruucda dalka iyo waajibaadka qaran. Waxaa si gaar ah loo adkeeyay in hawlgal kasta lagu saleeyo ilaalinta xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta, isla markaana la hubiyo in ficillada ciidanku ay waafaqsan yihiin xeerarka dalka iyo xeerarka caalamiga ah ee la xiriira dagaalka.

Sidoo kale, kulanka waxaa lagu falanqeeyay doora askariga Soomaaliyeed ee ku aaddan ilaalinta hantida dowladda iyo tan shacabka, iyo sida ay taasi qeyb uga tahay dhismaha kalsoonida u dhaxeysa Ciidamada Qalabka Sida iyo bulshada. Waxaa la xusay in ku-dhaqanka hab-dhaqan suuban iyo ilaalinta sharcigu ay yihiin tiirarka ugu muhiimsan ee guusha howlgalada amniga iyo sugidda xasiloonida dalka.

Ugu dambeyn, Xafiiska Xeerilaaliyaha Ciidamada Qalabka Sida ayaa dhiirrigelin iyo bogaadin u jeediyay ciidamada ku sugan furimaha hore, isaga oo ku ammaanay doorkooda halgameed ee difaaca qaranka. Waxaa sidoo kale la xaqiijiyay in xafiisku sii wadi doono kulamada wacyigelinta iyo kor-meerka noocan ah, si loo xoojiyo wada-shaqeynta u dhaxeysa garsoorka iyo ciidamada howlgalada ku jira, loona taageero gudashada masuuliyadda qaran ee ay u taagan yihiin.





Dardargelinta Howlaha Garsoorka ee Koonfur Galbeed

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee CQS, S/Guuto Liibaan Cali Yarow ayaa si qoto dheer looga hadlay dardargelinta howlaha baaxadda leh ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ka waddo deegaanada Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed, iyadoo xoogga la saaray sugidda caddaaladda, xoojinta ku-dhaqanka sharciga iyo gaarsiinta adeegyada garsoorka dhammaan gobollada iyo degmooyinka.

Sidookale Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee CQS, S/Guuto Liibaan Cali Yarow, ayaa amar cad ku bixiyay in shaqada Maxkamadda Darajada Koowaad ee Ciidamada Qalabka Sida si buuxda loogaarsiyo dhammaan deegaanada Koonfur Galbeed, si looga xaqiijiyo helitaanka caddaalad degdeg ah oo loo siman yahay, loona xoojiyo amniga iyo kala dambeynta.

Waxuu kale uu ka hadlay muhiimadda ay leedahay in si buuxda looga fogaado bin-jexlaysi iyo eex marka la baarayo laguna xukumayo kiisaska la xiriira Saraakiisha iyo Ciidamada Qalabka Sida.



Guddoomiyaha ayaa carrabka ku adkeeyay in Garsoorka Ciidamada uu ku shaqeeyo cadaalad, hufnaan iyo madax-bannaani buuxda, isla markaana aan la aqbali doonin wax faragelin ah, cadaadis ama eex ku saleysan darajo, xil ama qabiil.

“Sharcigu waa mid u siman dhammaan Saraakiisha iyo Ciidamada, mana jiri doono qof ka sarreeya sharciga,” ayuu yiri Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, isagoo xusay in dacwad kasta lagu qaadi doono caddeymo sharci ah, laguna go’aamin doono si waafaqsan xeerarka iyo nidaamka Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

Sidoo kale Guddoomiyaha ayaa amar ku bixiyay in Garsoorayaasha, Xeer-ilaaliyeyaasha iyo dhammaan laamaha la xiriira garsoorka ay si adag uga fogaadaan bin-jexlaysi kasta, isla markaana ay ilaaliyaan kalsoonida shacabka iyo sumcadda Garsoorka Ciidamada.

Ugu dambeyn, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa tilmaamay in ujeeddada ugu weyn ee Garsoorka Ciidamada ay tahay ilaalinta sharciga, xaqiijinta caddaaladda iyo xoojinta amniga dalka, iyadoo si siman loola dhaqmi doono dhammaan Ciidamada Qalabka Sida.





Xafiiska Xeerilaalinta Ciidamada Qalabka Sida ayaa kormeer iyo wacyigelin shaqo ku tagay Ururka 231aad ee Guutada 23aad, kuwaas oo ku sugan Xero Maslax ee Degmada Heliwaa. Kormeerkan ayaa qeyb ka ahaa dadaallada joogtada ah ee lagu xoojinayo ku-dhaqanka sharciga, anshaxa ciidanka iyo masuuliyadda ka saaran Ciidamada Qalabka Sida sugidda amniga qaranka.

Intii uu socday kulanka, Xeerilaaliyeyaasha ayaa ciidamada ka wacyigeliyay hab-dhaqanka laga rabo askariga Soomaaliyeed, gaar ahaan marka ay ku howlan yihiin hawlaha amniga iyo difaaca dalka. Waxaa si gaar ah loo adkeeyay muhiimadda ay leedahay ilaalinta nafta shacabka Soomaaliyeed, dhowrista xuquuqdooda, iyo in hawlgallada amni lagu fuliyo si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada dalka.

Ugu dambeyn, kormeerka iyo wacyigelinta ayaa diiradda lagu saaray ilaalinta hantida Ciidanka Qaranka, ka fogaanshaha ku takrifalka awoodda, iyo kor u qaadista kalsoonida u dhexeysa ciidamada iyo bulshada. Xafiiska Xeerilaalinta Ciidamada Qalabka Sida ayaa ku bogaadiyay Ururka 231aad sida ay uga go'an tahay gudashada waajibaadka qaran, wuxuuna ballan qaaday in uu sii xoojin doono kormeerka iyo wacyigelinta noocan ah.






Garsoorka Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed, oo ay ka mid yihiin Xeer-ilaalinta Ciidamada iyo garsoorayaal ka tirsan Maxkamadda Ciidamada, ayaa booqasho dhiirrigelin iyo bogaadin ah ku tegay geesiyaasha Ciidanka Xoogga Dalka iyo Ciidanka Deegaanka ee ku sugan deegaanka Xuseen Cageey ee Masagawaa, Gobolka Galgaduud. Ujeeddada booqashada ayaa ahayd in lagu muujiyo garab-istaag, mahadnaq iyo taageero ku aaddan doorka ciidamada ee sugidda amniga iyo la-dagaal-lanka argagixisada, kuwaas oo si geesinimo leh uga xoreeyay waddo istiraatiiji ah oo ay argagixisadu baad ka qaadayeen shacabka iyo gaadiidka ganacsiga.

Garsoorka CQS ayaa ku amaanay ciidamada naf-hurnimada, feejignaanta iyo adkeysiga ay muujiyeen, iyagoo xusay in howlgalkaasi uu gacan weyn ka geystay xasilinta deegaanka iyo fududeynta isku socodka bulshada. Waxay sidoo kale carrabka ku adkeeyeen in garsoorku mar walba garab taagan yahay difaaca qaranka, kana shaqeynayo xaqiijinta caddaaladda iyo ilaalinta sharciga ciidanimada. Ugu dambeyntii, waxay Allah uga baryeen guul, barako iyo abaal-jir joogto ah geesiyaasha Ciidanka Xoogga Dalka iyo Ciidanka Deegaanka ee u taagan difaaca dalka, diinta iyo shacabka Soomaaliyeed.



Garsoorka CQS Sida ayaa sidoo kale booqasho dhiirrigelin ah ku tegay Guutada 24aad “Khaalid Binu Waliid,” iyadoo gaaray deegaannada Daarul Nimca, Aadan Yabaal iyo War Gaadhi. Ujeeddada booqashadan waxay ahayd in lagu muujiyo taageero iyo bogaadin ku aaddan howlgaladii ay ciidamadaasi ka fuliyeen aagga, kuwaas oo horseeday in lagu soo afjaro ficillo argagixiso oo halis gelinayay nolosha dadka deegaanka. Intii lagu jiray kormeerka, waxaa la arkay burbur ay argagixisadu u geyssteen deegaanka, oo ay ka mid yihiin ceelal la duugay, ari la qarxiyay, iyo goobaha cibaadada oo lagu gubay si ula kac ah.

Waxaa kaloo aad loogu amaanay geesnimada, adkeysiga iyo feejignaanta ay muujiyeen, iyadoo caddeeyay in dadaalkooda uu door muhiim ah ka qaatay soo celinta amniga iyo ilaalinta xuquuqda shacabka. Waxay carrabka ku adkeeyeen in Garsoorka Ciidamada uu mar walba garab taagan yahay ciidanka difaaca qaranka, isla markaana uu ka shaqeynayo xaqiijinta cadaaladda, ilaalinta sharciga iyo kor u qaadidda anshaxa ciidannimada, si loo xaqiijiyo amni waara iyo nolol nabdoon oo shacabka Soomaaliyeed hanteen.





Sidookale waxaa Barbarasocday maxkamadeynta dambiyada ka dhacay furumaha dagaalka, si loo xaqiijiyo caddaalad degdeg ah, loona ilaaliyo sharciga iyo anshaxa ciidannimo.

Howlaha maxkamadeyntan ayaa ahaa kuwo si gaar ah loo dardargeliyay, iyadoo Maxkamaddu ay goobaha hawlgalladu ka socdaan u tagtay, isla markaana ay si toos ah u qaaday dacwadaha la xirii-ra dembiyada ka dhaca furimaha. Intii ay socdeen howlgalladan garsoor, Maxkamadda Ciidamada ayaa isla goobtaas ka heshay caddeymaha, marqaatiyaasha iyo dhibbaneyaasha, taas oo suurtagelisyay in dacwadda loo dhageysto si hufan, caddaaladna loo helo waqti ku habboon.

Ujeeddada ugu weyn ee tallaabadan ayaa ahayd in la xoojiyo ku dhaqanka sharciga, lana hubiyo in qof kasta oo ku lug yeesho falal ka hor imanaya shuruucda iyo xeerarka ciidannimo uu wajaho caddaaladda ku habboon. Sidoo kale, Maxkamaddu waxa ay diiradda saartay ilaalinta xuquuqda dhibbaneyaasha iyo xaqiijinta in marqaatiyaashu ay si xor ah oo ammaan ah u bixin karaan marag furkooda.



Intii ay socotay kormeerka iyo baarista ay sameynayeen Saraakii-sha Garsoorka Ciidamada, waxaa lagu soo arkay falal amni-darro iyo xadgudubyo culus oo ka dhan ah rayidka iyo kaabeyaasha bulshada, kuwaas oo ay geysteen kooxaha argagixisada.

Waxyaabihii La Soo Arkay oo ah arimo Liito:

- Waxaa la arkay masaajid ku yaalla deegaanka Deerul Nicmo, oo hoostaga degmada Ruunir-good, gobolka Shabeellaha Dhexe, kaas oo ay argagixisadu qarxiyeen, taasoo keentay burbur ballaaran.
- Argagixisadu waxay si ula kac ah u kala baxeen bambo ay ku tuureen ceelka biyaha ee degmada Aadan Yabaal, iyagoo doonayay in ay carqaladeeyaan isticmaalka biyaha ee shacabka.







- Sidoo kale, waxaa la soo arkay ceelka biyoodka ee degmada Moqokori, gobolka Hiiraan, kaas oo ay argagixisadu ku sameeyeen falal waxyeello ah, saameeyna ku yeeshay helitaanka biyo nadiif ah.
- Deegaanka Booco ee gobolka Hiiraan, argagixisadu waxay si arxan-darro ah u gowraceen 400 (afar boqol) oo neef oo ari ah, taas oo khasaare weyn u geysatay nolol-maalmeedka dadka deegaanka.
- Intaa waxaa dheer, baadiyaha degmada Maxaas, argagixisadu waxay ku gubeen hooyooyin iyo carruur aan waxba galabsan, falkaas oo ah xadgudub bani'aadantinimo oo culus kana hor imanaya xeerarka caalamiga ah ee ilaalinta rayidka.

Falalkan la soo arkay waxay muujinayaan xadgudubyo halis ah oo ka dhan ah rayidka, goobaha cibaadada, iyo kaabeyaasha nolosha bulshada, waxaa kale oo tahay in aysan jirin Arxan Bini aad





Kiiskii Dhacdada Wanla-weyn

Warbixintan waxay faahfaahin ka bixinaysaa dambiyo aad u culus oo lid ku ah bini'aadannimada, sharciga iyo qiyamka suuban ee bulshada Soomaaliyeed, kuwaas oo ka dhacay Degmada Wanla-weyn iyo deegaannada ku xeeran xilli ay halkaasi ka socdeen dirir sokeeye. Falalkan waxaa ka mid ahaa gubid qof nool ah, gowrac, jar-jarid xubnaha jirka, gubid tuulooyin iyo ceelal biyoodyo, iyo xasuuq loo geystay dad rayid ah. Dhacdooyinkan waxay si cad u muujinayaan in si buuxda loo jebiyay xeerarkii xakameynta colaadaha iyo hab-dhaqankii suubanaa ee ay waajibka tahay in la dhowro.

Mid ka mid ah falalka ugu naxdinta badnaa ayaa ahaa gubid nolol ah oo loo geystay Marxuum Isaaq Daa'uud Maxamed, oo ahaa nin 60 jir ah, kana xanuunsanayey dhimirka muddo 33 sano ah. Marxuumka ayaa kasoo fakaday xarun lagu baxnaaninayey oo ku taalla Balli-doogle, balse wuxuu gacanta u galay maleeshiyaad ku abaabulnaa qaab beeled. Waxaa loo geystay jirdil wadareed, kadibna waxaa lagu jiiday mooto xamuul ah, ugu dambeyntiina waxaa la gubay isagoo nool. Falkaasi wuxuu dhacay 07/11/2025, deegaanka Dudumaay ee duleedka Wanla-weyn. Eedeysanayaal tiradoodu dhan tahay 9 qof ayaa maxkamadda kasoo hormuuqday, halka 13 kale oo ay ku jirto haweeney lagu magacaabo Muslimo Cabdi Kuusoow ay weli maqan yihiin.





Sidoo kale, warbixintu waxay xustay falal kale oo dil iyo xasuuq ah oo loo geystay dad rayid ah, oo ay ka mid tahay weerar dhacay 27/09/2025 oo lagu qaaday Warta Cismaan, halkaas oo maleeshiyaad hubeysan oo uu hoggaaminayey Yuusuf Aadan Xuseen Suuleey ay dileen 12 qof, kuna dhaawaceen 7 kale, kadib markii uu fashilmay qorshe afduub ah. Kooxdani waxay isku ekaysiisay Kha-wariij, si aan loo aqoonsan, hase yeeshee waa la garowsaday ujeeddadooda, taasoo horseeday falkaas argagaxa leh.

Dhacdo kale oo aad u foosha xun ayaa ka dhacday deegaanka Yaaqbari weyne, halkaas oo maleeshiyaad uu hoggaaminayey Cali Isaaq Guuleed (Cali Yariis) iyo ku-xigeenkiisa Fu'aad Axmed Maxamed Duqow ay weerar ku qaadeen ceel biyood 10/11/2025, taasoo keentay dhimashada 5 qof iyo dhaawaca 5 kale, isla markaana lagu gubay matooradii ceelka. Isla kooxdaas ayaa lagu helay dil fool xun oo loo geystay Marxuum Cismaan Xasan Maxamed Oowliyo 22/10/2025, kaas oo lagu sameeyay jarid xubno jirkiisa ah, calooshana laga soo bixiyay, meydkiisana lagu suray aargada deegaanka. Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida waxay dhageysatay markhaatiyaal ay ka mid yihiin ehelada dhibbanayaasha, gaadiidley ka shaqeeya gobolka Shabeellaha Hoose, iyo masuuliyiinta amniga ee degmada Wanla-weyn. Xafiiska Xeerilaalinta ayaa kusoo eedeeyay falalka arxanka daran ay ka geesteen deegaannada aan kor kusoo xusnay waxaana Maxkamadda darajada koowaad ku xukuntay dil toogasho.



6. Nabadeynta & Xasilinta Deegaannada

Degmada Baraawe, oo ka tirsan Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya, isla markaana ah magaalo qadiimi ah oo caan ku ah ilbaxnimada, ganacsiga iyo taariikhda Soomaaliyeed, ayaa waxaa sanadkan ka dhacay dagaal dhex maray dad deegaanka ah. Markii dirirtaasi dhacday, garsoorka iyo hay'adaha amniga ayaa si degdeg ah uga jawaabay, iyagoo u baxay:

1. Inay qiimeeyaan xaalada amni
2. Inay soo afjaraan colaadda
3. Inay la falgalaan dadka deegaanka
4. Inay bilaabaan wacyigelin iyo nabadeyn

Kulankaas waxaa lagu xoogga saaray in shacabka loo wacyigeliyo muhiimadda:

1. Nabadgelyada
2. U hoggaansanaanta dowladnimada
3. Xallinta khilaafaadka iyada oo loo marayo habraaca sharciga
4. Ilaalinta hantida, nolosha iyo xuquuqda dadka rayidka ah

Dagaalkii dhacay wuxuu sababay qasaare nafeed iyo dhaawac, wuxuuna hakad geliyay noloshii bulshada. Waxaa si hoose loo eego qodobbadii sababay hubanti la'aanta, iyadoo Maxkamadda Ciidamada ay door muuqda ka qaadatay:

1. Kala dhexgalka beelaha
2. U diyaarinta xal sharci ah oo degdeg ah
3. Xoojinta nabadda iyo wada-noolaanshaha

Magaalada Baraawe





Magaalada Baraawe

Ujeeddadu waxay ahayd nabadeyn, isu-soo-dhoweyn, iyo xal-wadaag degdeg ah, iyadoo shacabka lagu booriyay inay u hoggaansamaan dowladnimada, maadaama ay tahay saldhigga:

1. Nabadda
2. Waxbarashada
3. Caafimaadka
4. Caddaaladda
5. Horumarka bulshada

Colaaddaasi waxay keentay qasaare nafeed iyo dhaawac oo saameeyay nolosha deegaanka, waxaana warbaahinta qaar lagu arkay warar marin-habaabin ah oo ku saabsan dhacdada. Garsoorka Ciidamada ayaa goob-joog u noqday xaaladda, si loo hubiyo in eedeysanayaasha loo maro habraaca garsoorka ee waafaqsan sharciga dalka.

3. Doorka Garsoorka CQS ee Nabadeynta & Xasilinta

Inta badan kulamadan, booqashooyinkan iyo wacyigelintan waxaa hoggaaminayay:


General Liiban Cali Yarow, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee CQS

Gashanle Sare Xasan Cali Nur Shuute, Guddoomiyaha Maxkamadda Darajada Koowaad

Labadan hoggaan ayaa door muuqda ka qaatay:

- Xasilinta deegaanada ay dirirtu ka dhacday
- Nabadeynta beelaha
- Kala dhexgalka bulshada
- Kuur-gelinta sababaha colaadaha
- Hubinta in sharcigu noqdo kan kala saara dhinacyada isku khilaafay





7. Nidaamka Danabeysan ee Maareynta Xogta Garsoorka

Nidaamka maareynta xogta ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida waa nidaam casri ah oo dhijitaal ah oo loo sameeyay si loo ururiyo loona habeeyo dhammaan xogaha la xiriira kiisaska sharciga ee ciidamada. Nidaamkan, oo si buuxda u shaqeeyay sannadka 2025, wuxuu beddelay habkii hore ee gacanta lagu maamuli jiray dacwadaha, isagoo meesha ka saarayay dib u dhacyo iyo xog lumis. Waxay suurta gelisay in xog kasta oo dacwad ah laga helo hal meel oo isku xiran, taas oo si weyn u kordhisay hufnaanta shaqada garsoorka.

Nidaamku wuxuu si toos ah u diiwaangeliyaa dacwadaha cusub, u kaydiyaa xogaha baarista, una fududeeyaa in la socod buuxa laga helo marxaladaha dacwadaha ilaa heerka xukunka. Waxay sare u qaaday isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta maamul, maadaama dacwad kasta ay ku leedahay raad-dhac dhijitaal ah oo aan lagu beddeli karin si sharci-darro ah. Sidoo kale nidaamku wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro tirakoobyoo faahfaahsan oo muujinaya noocyada dembiyada, heerarka kordhaya ama hoos u dhacaya, iyo sida dacwaduhu u socdaan dhammaan heerarka maamulka garsoorka.

Sanadka 2025, nidaamkan dhijitaalka ahi wuxuu noqday mid ka mid ah guulaha ugu waaweyn ee Maxkamadda Ciidamada, maadaama uu dardar geliyay habraacyada shaqo, yareeyay waqtiga la gelinayo diyaarinta warbixinaha, kuna kordhiyay awoodda maxkamadda ee qiimeynta xogta iyo qorsheynta dagaalka ka dhanka ah dembiyada ciidamada. Waxaa sidoo kale laga dheehan karaa in nidaamkani uu kor u qaaday amniga xogta, isagoo lagu kaydiyo servero ammaan ah oo yareynaya halista xog-lumis iyo faragelin sharci-darro ah.



QORSHAHA SANADKA XIGA

Sanadka soo socda, Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida waxay qorsheysay in ay sii xoojiso casriyeynta maamulka iyo farsamada, gaar ahaan nidaamka dhijitaalka ah ee DIMS, oo noqday laf-dhabarta maaraynta galalka dacwadaha sanadkii 2025. Waxaa la kordhin doonaa isku-xirnaanta xafiisyada xeer-ilaalinta heer federaal iyo heer gobol si gal kasta oo dacwad ah looga helo xog rasmi ah oo waqti ku habboon. Tani waxay sii dardargelin doontaa go'aan qaadashada, la socodka heerarka dambiyada, waxayna sare u qaadi doontaa hufnaanta, isla xisaabtanka iyo awoodda saadaalinta ee garsoorka ciidamada.

Waxaa sidoo kale qorshaha ku jira in la ballaariyo tababarrada gudaha iyo dibadda ee garsoorayaasha, baarayaasha, iyo saraakiisha dacwad-oogista. Tababarradii sanadkii 2025 ee la xiriiray baarista argagixisada, maareynta goobaha qaraxyada, cryptocurrency, iyo farsamooyinka wareysiga casriga ah ayaa muujiyay natiijooyin muuqda. Sidaas darteed, sanadka 2026 waxaa la diyaarin doonaa manhaj horumarsan oo daboolaya shuruucda ciqaabta, caddeymaha forensiga, iyo la shaqeynta hay'adaha amniga. Sidoo kale Maxkamaddu waxay qorsheyneysaa in ay xoojiso iskaashiga hay'adaha amniga sida NISA, CID, Booliska, XDS iyo Asluubta, kuwaas oo sanadkii 2025 soo gudbiyay in ka badan 4,000 gal dacwadeed. Hay'adahan ayaa noqon doona laf-dhabarka dadaallada lagu xoojinayo la-dagaalanka dambiyada, waxaana la filayaa in la sameeyo hannaan wada shaqeyn dhijitaal ah oo lagu diiwaangeliyo, lagu falanqeeyo loona kala hormariyo kiisaska culus gaar ahaan kuwa argagixisada iyo dambiyada ay galaan ciidamada.

Intaa waxaa dheer, waxa la gogol xaarayaa qorshaha lagu aas-aasi lahaa Machadka Tababarka Baarista Dambiyada ee Ciidanka Xoogga Dalka, oo noqonaya xarun rasmi ah oo lagu hormariyo xirfadaha saraakiisha baarta dambiyada. Machadkan ayaa lagu baran doonaa hababka casriga ah ee baarista, ilaalinta goobta dembiga, uruurinta caddeymaha, diyaarin sharciyeedka faylasha dacwadaha, iyo habraacyada garsoorka ciidamada. Ujeeddadu waa in la dhiso hannaan mideysan oo dhammaan saraakiisha baarista ay ku helaan tababar heer sare ah, taas oo kor u qaadaysa tayada dacwadaha, kalsoonida bulshada, iyo guusha galalka maxkamadeynta.

Maxkamaddu waxay sanadka 2026 xoogga saari doontaa kormeerka xabsiyada, ilaalinta xuquuqda maxaabiista, iyo dib-u-habaynta adeegyada caafimaadka, nadaafadda iyo tirakoobka ee xabsiyada oo warbixintii 2025 muujisay inay baahi weyn u leeyihiin. Waxaa la hirgelin doonaa nidaam casri ah oo lagu maareeyo xogta maxaabiista, iyada oo la kordhinayo kaabayaasha iyo tababarka shaqaalaha. Qorshaha guud ee 2026 wuxuu noqon doonaa mid isku dhafan oo xoojiya tayada, hufnaanta iyo awoodda garsoorka ciidamada ee ku wajahan la-dagaalanka dambiyada iyo ilaalinta anshaxa ciidanka.



CAQABADAHA

Caqabadda ugu weyn ee la kulantay sanadka 2025 waxay ahayd tirada dacwadaha oo si aad ah uga batay tirada sanadkii hore. Galalka dacwadaha ayaa kordhay 54.2%, halka eedeysanayaashu ay laba jibbaarmeen oo gaareen 6,036. Culayskan shaqo wuxuu hoos u dhigay xawaaraha qiimeynta galalka, wuxuuna sare u qaaday baahida loo qabo kordhinta shaqaalaha, tababarka, iyo qalabka dhijitaalka ah.

Dambiyada la xiriira argagixisada ayaa noqday caqabadda labaad ee ugu culus. 99.56% kiisaska argagixisada waxay ku lug lahaayeen kooxda Al-Shabaab, kuwaas oo u baahan baaris gaar ah oo qoto dheer, caddeymaha forensiga, iyo ilaalin amni oo sareysa. Hawlaha ay maxkamaddu ku bixiso kiis kasta oo noocan ah waa mid dheer oo culus, taas oo hoos u dhigta awoodda loo leeyahay in si degdeg ah loo maareeyo dacwadaha kale.

Waxaa sidoo kale jiray caqabado la xiriiray maamulka xabsiyada, gaar ahaan dhibaatooyinka dhanka daryeelka caafimaadka, nadaafadda, iyo tirada maxaabiista oo mararka qaar ka badan awoodda xabsiyada. Kormeerkii 2025 wuxuu muujiyay baahida degdegga ah ee loo qabo tababar-ka shaqaalaha xabsiyada iyo dib u habeynta nidaamyada diiwaangelinta maxaabiista.

Caqabadaha kale waxaa ka mid ah hoos u dhaca edaabta askarta qaarkood, iyadoo XDS iyo Booliska ay ahaayeen labada ciidan ee ugu badan ee kiisaskooda soo kordheen. Arrimahan waxay muujinayaan baahida loo qabo tababaro habdhaqanka, wacyigelin ciidan, iyo xoojinta xiriirka shacabka, si loo yareeyo dambiyada gudaha ciidamada.



FURSADAHA

Sanadka 2025 wuxuu Garsoorka Ciidamada u iftiimiyay fursado dhanka casriyeynta iyo maamulka ah, gaar ahaan hirgelinta nidaamka dhijitaalka ah ee kaydinta xogta dacwadaha CMS (Case Management System). Nidaamkan cusub wuxuu noqday tiir muhiim u ah hufnaanta shaqada garsoorka, maadaama uu hoos u dhigay habkii buug-gacmeedka, kordhiyaana helitaanka xog sax ah oo degdeg ah. Tani waxay suuragelisay in dacwadaha si nidaamsan loo kala hormariyo, loona abuuro warbixino tirakoob oo qiimo weyn leh. Guusha nidaamkan waxay furtay fursad ah in mustaqbalka la ballaariyo isku-xirnaanta xafiisyada Garsoorka heer gobol iyo heer federaal, si loo helo xog mideysan oo qaranka oo dhan laga heli karo.

Tababarradii gudaha iyo dibedda ee la bixiyay 2025 ayaa sidoo kale noqday fursad qaali ah oo sare u qaaday xirfadaha shaqaalaha garsoorka. Saraakiisha waxaa loo tababaray baarista argagixisada, sida loo maareeyo goobaha qaraxyada, baarista lacagaha cryptocurrency, farsamooyinka wareysiga casriga ah, iyo sida xogaha sirtoonka loogu beddelo caddeymo sharci ahaan loo adeegsan karo. Tababarradan waxay keeneen in Maxkamaddu yeelato khubaro gudaha ah oo awood u leh inay si madax-bannaan oo xirfad sare leh u maareeyaan dacwadaha culus, taas oo hoos u dhigtay ku-tiirsanaanta taageerada caalamiga ah.

Sidoo kale wacyigelinta ciidanka iyo booqashooyinka garsoorka ee furimaha iyo xarumaha ayaa noqday fursad kale oo muhiim ah. Kulamada lagu wacyigeliyo ciidanka ee la qabtay 2025 waxay sare u qaadeen fahamka askarta ee ku saabsan anshaxa, waajibaadka ciidamada, iyo doorka maxkamadda ee ilaalinta sharciga. Tani waxay sare u qaaday xiriirka u dhexeeya garsoorka iyo ciidamada, waxayna hoos u dhigtay dembiyada gudaha ciidamada qaarkood, taas oo mustaqbalka u abuuraysa jawi shaqo oo leh xushmad sharciga iyo anshaxa ciidanka.

Ugu dambayn, fursad weyn waxay ku jirtaa kalsoonida bulshada ee sii kordheysa ee garsoorka ciidamada, taas oo lagu kasbaday daahfurnaanta warbixinaha, hufnaanta dacwadaha la maareeyay, iyo xukunno cadaalad ku dhisan oo la fuliyay 2025. Kalsoonidan bulshada waxay Maxkamadda u abuurtay jawi ay ku heli karto taageero ballaaran oo lagu horumarin karo adeegyada garsoorka, lagu heli karo taageero siyaasadeed, laguna xoojin karo hawlgallada amniga. Tani waa fursad qaran oo muhiim ah oo Maxkamaddu ay ka faa'iidayo karto si ay u noqoto hay'ad ku hoggaamisa casriyeynta garsoorka militari ee Soomaaliya.





TALO SOO JEEDIN

1. Xoojinta Nidaamka Dhijitaalka ah (Digital Case Management System)

- In la ballaariyo hawlaha nidaamka DIMS/DCT si loo suurtageliyo isku-xirnaanta dhammaan xafiisyada Garsoorka gobolka iyo heer federaal.
- In la kordhiyo kaydinta xogta daruuriga (cloud backup) si loo yareeyo khatarta xog-lumis iyo in xogta laga heli karo meel kasta oo dalku yahay.

2. Tababarka Xirfadeed ee Garsoorayaasha & Baarayaasha

- In la diyaariyo manhaj tababar sanadle ah oo diiradda saaraya argagixisada, forensics, cyber-crime, iyo waraaqaha caddeynta (chain of custody).
- In la sameeyo xarun tababar oo gaar u ah Garsoorka Ciidamada si loo helo aqoon joogto ah oo gudaha ah, loona yareeyo ku tiirsanaanta tababarka dibadda.

3. Xoojinta Isla-Xisaabtanka Ciidan & Anshaxa Shaqada

- In ciidamada loo diyaariyo wacyigelin joogto ah oo ku saabsan edaabta, waajibaadka, iyo cawaaqibka sharci ee jebinta xeerarka.
- In la hirgeliyo nidaam digniin horudhac ah (Early Warning System) oo lagu ogaan karo askarta ku soo noqnoqda dembiyada ama edaab-darrada.

4. Horumarinta Kormeerka Xabsiyada & Daryeelka Maxaabiista

- In la casriyeeyo nidaamka gacanta ku haya xogta maxaabiista (Prisoner Information System) si loo hubiyo daahfurnaanta iyo ilaalinta xuquuqda maxaabiista.
- In la xoojiyo adeegyada caafimaadka iyo nadaafadda xabsiyada si loo yareeyo cabashooyinka bulshada iyo khataraha caafimaad.

5. Sare U Qaadista Wacyigelinta Ciidamada

- In la kordhiyo barnaamijyada wacyigelinta ee ka socda saldhigyada iyo furimaha, kuwaas oo hoos u dhigay dembiyada anshaxa 2025.
- In wacyigelinta lagu daro casharro ku saabsan xiriirka shacabka, maadaama bulshada ay saameyn ku leedahay kalsoonida garsoorka.

6. Xoojinta Iskaashiga Laamaha Amniga

- In la sameeyo hannaan wada shaqeyn joogto ah oo u dhexeeya NISA, CID, Booliska, Asluubta iyo XDS si xogta kiiska loo helo degdeg.
- In la dhiso guddi wadajir ah oo loo xilsaaro falanqaynta dembiyada argagixisada iyo qorshaha ka hortagga.



7. Hagaajinta Kaabayaasha Xafiisyada Garsoorka

- In lagu daro miisaaniyadda dhismaha xafiisyo cusub ama dayactirka kuwa jira si loo yareeyo ciriiriga shaqo ee jira.
- In la siiyo qalab casri ah sida computers, scanners, cameras for evidence, iyo network ammaan ah.

8. Kordhinta Shaqaalaha Khabiirada ah

- In maxkamadda lagu kordhiyo baarayaal, qareenno ciidan, IT-specialists iyo dhaqaatiirta forensics oo awood u leh inay maareeyaan dacwadaha culus.
- In la sameeyo nidaam dhiirigelin (incentives) oo soo jiita khubaro badan oo gudaha ah.

9. Abuurista Cutub Falanqeeya Dembiyada (Crime Analysis Unit)

- In la dhiso unug gaar ah oo falanqeeya tirakoobka dembiyada, saadaaliya khataraha soo kordhaya, kuna dhisa xog dhab ah qorshaha hawlgallada.
- Unuggan wuxuu noqon karaa isha ugu weyn ee go'aan qaadashada istaraatiijiga ah.

10. Daahfurnaanta & Wada-shaqeynta Bulshada

- In warbixinaha waxqabadka sanad kasta si nidaamsan loogu faafiyo bulshada si loo kordhiyo kalsoonida garsoorka.
- In la sameeyo kulan sanadle ah oo lala yeesho bulshada iyo madaxda ciidamada si loo fahmo cabashooyinka iyo baahiyaha jira.



GUNAANAD

Sanadka 2025 wuxuu Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida u noqday sanad muujiyay isbeddel muuqda, horumar la taaban karo, iyo adkeysii hay'adeed. Inkasta oo ay jireen caqabado culus oo ay ka mid yihiin kororka tirada dembiyada, badnaanshaha dacwadaha cusub, iyo culaysyo la xiriira amniga gudaha, haddana Maxkamaddu waxay awoodday inay muujiso karti iyo xirfad sare oo ku wajahan fulinta waajibaadkeeda sharciga ah. Dadaalka joogtada ah ee lagu xaqiijinayo in dacwad kasta hesho mudnaanteeda sharci ayaa caddeyn u noqday u heellanaanta Maxkamadda ee ilaalinta caddaaladda ciidamada.

Hirgelinta nidaamka dhijitaalka ah ee lagu maareeyo galalka dacwadaha ayaa noqotay mid ka mid ah guulaha ugu muhiimka ah ee sanadkan, maadaama uu si weyn u kor u qaaday hufnaanta tirokoobka, daahfurnaanta shaqada, iyo awoodda maamulka ee la socodka dacwadaha marxalad kasta oo muhiim ah. Nidaamkan casriga ah wuxuu meesha ka saaray caqabadihii la xiriiray kaydinta xogta dhaqameed, wuxuuna sabab u noqday in go'aannada sharci ee Maxkamaddu ku saleysnaadaan xog dhammaystiran oo la isku halayn karo.

Warbixinta waxqabadka sanadkan waxay sidoo kale muujisay muhiimadda ay tababarrada xirfadeed, kormeerka xabsiyada, iyo wacyigelinta ciidamada u yeesheen kor u qaadista tayada shaqada garsoorka. Tababarradii la bixiyay waxay sare u qaadeen fahamka sharciga, habraacyada caddeymaha, iyo sida loo maareeyo dacwadaha khatarta sare leh sida argagixisada. Hufnaanta habraacyadaas cusub waxay sare u qaaday kalsoonida bulshada iyo hay'adaha amniga ee ku aaddan shaqada Maxkamadda. In kasta oo ay jireen culaysyo shaqo oo ka dhashay kororka tirada eedeysanayaasha iyo dambiilayaasha, haddana Maxkamaddu waxay ku guuleysatay in ay abuurto jawi muujinaya diyaar-garow iyo awood wax-ka-qabasho oo joogto ah. Tirakoobyada iyo falanqaynta xogta ee sanadkan ayaa noqday aalad muhiim u ah qorsheynta istaraatiijiyadda 2026, iyadoo muujiyay meelaha u baahan xoojinta iyo meelaha fursadaha ay ka muuqdaan. Tani waxay caddeynaysaa in Maxkamaddu leedahay awood ay ku kobciso hanaankeeda shaqo iyadoo ka duuleysa xog dhab ah.

Ugu dambayn, waxqabadka 2025 wuxuu dhidibada u taagay aasaas lagu horumarinaayo nidaamka garsoorka ciidamada sannadaha soo socda. Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida waxay muujisay in ay tahay hay'ad leh aragti fog, shaqo joogto ah, daahfurnaan, iyo awood sharci oo koraysa, kuwaas oo si toos ah u taageeraya amniga qaranka. Guulaha sanadkan laga gaaray casriyeynta maamulka, tayeynta shaqaalaha, iyo hagaajinta nidaamka dacwadaha waxay caddeeyeen in garsoorka ciidamada uu yahay tiir lagu kalsoonaan karo oo dalka u horseedi kara xasillooni iyo sharciyad waarta.



DHAMMAAD !

DHAMMAAD !

DHAMMAAD !



